



MICHIGAN

Buuug-gacmeedka Hawl-wadeenka Mootoooyinka

Jocelyn Benson
Xoghayaha Gobolka

Michigan.gov/sos



Waaxda Gobolka Michigan, Maajo 2022

Buug-gacmeedkani wuxuu kaabaya What Every Driver Must Know (Waxa Darawal Waliba Tahay Inuu Ogaado), ee Michigan kaas oo daboolaya qawaaniinta wadada, calaamadaha, tilmaamaha, astaamaha wadooyinka, iyo dhaqamada gaari wadidda badbaadada leh.

Macluumaadka, garaafyada, iyo sawirada ku jira buug-gacmeedkan waxaa bixiyay oo ku mahadsan Aasaaska Badbaadada Mootada (Motorcycle Safety Foundation) iyo Highway Safety Services LLC iyo sidoo kale Guddi-hoosaadka Dhawridda Tijaabada ee AAMVA & Kooxda La-talinta Daneeyayaasha.



MSF Motorcycle Safety Foundation
2 Jenner, Suite 150, Irvine, CA 92618
949-727-3227 / msf-usa.org



AAMVA American Association of Motor Vehicle Administrators
4401 Wilson Boulevard, Suite 700
Arlington, Va 22203
703-522-4200 / aamva.org



TALOOYIN FUDUD: Ma Tahay Inaad Wado Mooto?

Wadida mootada waa khibrad gaar ah. Wadista waa mid xiiso leh oo dhiirrigelin leh, hadana waxay u baahantahay xirfad wadis nabdoon ah, iyadoo ay mootada u weheliso la'aanta difaaca la midka ah kan shilalka baabuurta, taa oo shaki galin karta in qofku doorto inuu wado mootada in kale. Qaar ka mid ah wadayaasha suurtagalka ah ayaa lahayn awoodda fulinta ficillo xirfad leh iyo waqtii ku habboon jawi taraafig oo adag; kuwa kale waxay laheen xukun aad u wanaagsan ama ma laha faham saxan oo ku saabsan fikradda maaraynta halista.

MSF waxa ay aaminsantahay in mooto wadidda aysan ahayn mid ay samayn karaan dhammaan dadka. Haddii aad tixgelineyo inaad noqoto wade, si kastaba ha noqotee, halkan waxaa ah su'aalo aad u isticmaasho is-qimaynta awoodaha jireed iyo aragtida maskaxda ee looga baahan yahay inaad si badbaado leh ugu hagto mootada wadada:

1. Miyaad ka halis qaadasho badan tahay dadka kale ee aad taqaan? Haddii aad u badan tahay inaad xamaasadooto markaad baabuurka wado oo aad leedahay hab-dhaqanno dagaal ama damac halis leh (aad ugu dhawaanshaha gaariga kaa horeeyo, leexashada adiga oo aan ishaar bixin, ku hadlidda telefoonka gacanta, ku xanaaqidda darawaliinta kale, ivm.), waxaa dhici karta in aadan ahayn shaqsi loogu talagalay moota wadista. In kasta oo wadista mootada ay wanaajiso tayada nolosha guud ee dadka inta badan, hadana qaarbaa waxay u horseedi kartaa musiibo. Malaha in shilalka ay ku dhacaan dadka kale oo keliya waa fikir ku gelin karta dhibaato.
2. Miyaad ka xayn kartaa baskiil? Tani waxay shardi u tahay iska diiwaangelinta koorsadeena RiderCourse ee Aasaasiga ah, guud ahaanna waa cabbir wanaagsan oo lagu ogaado awoodda aad u leedahay inaad waddo mootada. Baaskiil wadista, sida mootada, waa dhaqdhaqaaq jireed oo ku lug leh isku dheelitir iyo isku dubarid. Oo aan sii faahfaahinno isku dubaridkana...
3. Ma wadi kartaa gaariga maarsho gacmeedka? Tani ma ahan shardi, laakiin waxa laga yaabaa inay fududayo barashada wadista mootada maadaama ku dhawaad dhammaan mootooyinka ay leeyihiin maarsho gacmeedka. Haddii aadan weli awoodin marsho baddelidda laakiin aad weli rabto inaad ku damaashaado laba-lugood matoor leh, waxaad kugu haboonaan karo mootada iskuurtarka ah. Mootooyinka iskuutarada guud ahaan waxay leeyihiin marshada otomaatiga ah waxayna kala yihiin cabbirro badan, laga soo bilaabo moodallada awood yar oo leh cabbir matoor ah 50 saddex-jibbaarane sentimitir (cc) ilaa moodallada 650cc ee matoorka leh.
4. Araggaagu ma wanaagsan yahay? Wadista mootada waxay u baahan tahay xirfado garasho oo gaar ah oo ku tiirsan arag wanaagga. Miyaad martay baaritaan indhaha ah dhawaan? Ma waxaad u badan tahay inaad aragto waxyaabaha fog xoogaa kadib dadka kale ee aad taqaan markay arkaan? Kartida fogaan wax ka aragga ayaa muhiim u ah wadidda badqabka leh.

5. Makaanikada ma ku wanaagsan tahay? Mootooyinka maanta waa mashiinno la isku halleyn karo, laakiin marka dhammaan boolalka, bir-qabatada, iyo makiinadaha kale ee ku jira gudaha iyadoo laba taayir keliya ay kugu hayaan laamiga, waxaad u baahan tahay inaad awood u yeelato inaad kormeerto qalabkaaga oo mararka qaar aad cillad bixiso. Uma baahnid inaad noqoto makaanig sare, laakiin faaiido ayay kuu tahay inaad taqaan aaryaynta taayarka iyo adeegsiga isbaanada. Inta badan wax kasta oo uu waduhu u baahan yahay inuu ogaado wuxuu ka heli karaa buugga milkiilaha mootada, oo haddii aadan waligaa aqrin buugga milkiilaha gaariga, taasi waxay calaamad u noqon kartaa in aadan shaqsi moota kaxeynta loogu talagalay ahayn.
6. Ma waxaad tahay qof badbaadada dhowro? Haddii aad dhaawac is gaarsiiso marwaiba oo aad shaqooyin dayactir ama hagaajin aad iskaa uga samayso guriga dhexdiisa ah, ama ay kula tahay caadi in baabuur la kaxeyyo adigoo dawakhsan, markaa caqabadaha gaarka ah ee wadista mootada waxa laga yaabaa inaysan la jaan qaadi karin go'aan qaadashadaada. Wadayaashu waxay xakamayn karaan xaalandahooda kaliya marka ay badbaadadu u leedahay mudnaanta sare. Malaayiin wadayaasha mootada ayaa jara malaayiin mayl iyadoo wax shil ah dhicin, waxayna u badan tahay inaynan sahlan badbaadada.
7. Miyaad mudnaanta siisaa mishiinada iyo qalabka kale ee khatarta leh? Tusaale ahaan, marka aad isticmaalayo makiinada coowska lagu jaro ama silsiladda jaridda, miyaad si sax ah u dayactirtaa oo ma xirataa ilaaliyaha indhaha/dhegta/gacmaha marka loo baahdo? Haddii aad sahlato badqabka la xiriira mashiinnada iyo qalabka sahlan ee si qaldan u isticmaalkooda uu horseedi karo dhaawac culus, waxaa laga yaabaa inaadan sida looga baahan yahay mudnaanta u siinin raacista taxaddarrada badbaadada ee wadista mootada. Wadayaasha guuleysta waxay ogyihiin in badbaadadu aysan ku imaan nasiib, laakiin ay ku timaaddo samaynta waxyabaha saxda ah si loo yareeyo khatarta.
8. Ma foojignaan kartaa? Feejignaan la'aantu waa sababta ugu weyn ee keenta shilalka. Wadista badbaadada mootada nabdoon waxay u baahan tahay fiiro gaar ah u lahaanshaha ku soo boodada iyo ka warqabka wax kasta oo ka socda wareega 360 digrii ee agagaarkaaga. Xiliyada taraafikida culus ee aad waddo mootada ma ahan marka aadan feejignaan la'aan. Tusaale ahaan, haddii aad isku aragto inaad si xad dhaaf ah u isticmaalayo bareega kadib mar uu maankaaga tagay, ama inta badan aad ku baraarugto gaari ama taraag ku baasay oo aadan arkin, ogaanshahaaga xaaladeed ayaa ahaan karto mid gaaban.
9. Ma xakamayn kartaa baabuurkaaga marka ay xaalad degdeg ahi timaado? Darawaliintu inta badan uma baahna inay si adag u qabtaan bareega ama halhaleel ugu leexdaan si ay shil ugu badbaadaan, laakiin waa muhiim inay lahaadaan xirfado ay ku awoodaan inay sidaas sameeyaan marka loo baahdo. Marka loo yimaado wadista mootada, lahaanshaha xirfadaha noocan ah waa lama horaan maxaa yeelay isticmaaleyaasha kale ee wadooyinka badanaa si sahlan uguma arkaan wadayaasha mootada ee waddooyinka, gaar ahaan isgoysyada.
10. Ma doonaysaa inaad wakhti geliso inaad barato habka saxda ah ee loo wado ka hor inta aanad fuulin mootada? "Wadista koowaad" ee kuugu fiican waa RiderCourse Aasaasiga ah halkaas oo aad ku tijaabin karto wadidda badbaadada leh ee mootada. Waxaad xitaa koorsada u qaadan kartaa tijaabo ahaan, si ay kaaga caawiso inaad si fiican u fahanto dhaq-dhaqaaqa wadista wanaagsan iyo inaad go'aamiso haddii moota wadistu ay kugu habboon tahay.

Tusmada

Qaybta koowaad	Shatiyeynta Michigan ee Wadaha Mootada	
	Motoo ayididda	1
	Barnaamijka Waxbarashada Wadaha ee Michigan.....	7
	Shuruudaha diiwaangelinta mootada ee Michigan	9
Qeybta Labaad	Sharciyada Mootooyinka ee Michigan	11
	Ayididda iyo Oggolaanshaha Waxbarashada Ku Meel Gaarka ah	11
	Maandooriyaha iyo Khamriga.....	12
	Xadgudubyada Madaniga ah	12
	Qalab	13
Qeybta Saddexaad	U Diyaar ah Wadista	16
	Khamriga, daroogooyinka kale, iyo wadista	16
	MSF – TALOOYIN FUDUD: Muhiimadda ay leedahay Wadidda Adiga oo aan Ku Sakhraan sanayn Khamrada ama Maandooriyaha kale.....	18
Qaybta Afraad	Kahor Intaadan Wadin	20
	MSF – Waxa Ay Tahay Inaad Ka Ogaato Koofiyadaha Mootooyinka.....	23
	Baro mootadaada	27
	Hubin wadista ka hor.....	28
	MSF – Liiska baarista ee T-CLOCS	30
	MSF – TALOOYIN FUDUD: Qalabka Lidiga Bareeg Xiraha (ABS)	31
Qeybta Shanaad	Wadidda Asaasiga ee Mootada	32
	Halka aad ka bilaabeys	32
	Leexasho.....	34
Qeybta Lixaad	Xirfadaha Wadada.....	36
	Maareynta khatarta.....	36
	Maareynta boosaska banaan.....	38
	MSF – TALOOYIN FUDUD: KASOO QAAD IN AAN LAGU ARKEYNIN-HI	41
	Maareynta xawaaraha	43
Qeybta Todobaad	Maareynta wadada	46

Qeybta Sideedaad	Xaaladaha Khaaska ee Mooto Wadida.....	49
Qeybta Sagaalaad	Rakaabka, Xamuulka iyo Koox Wada-socosho	53
	MSF – TALOOYIN FUDUD: Habraaca Wadida Mootada Rakaabka Saaran Yahay	56
	MSF – TALOOYIN FUDUD: Habraaca MSF ee Kooxaha Mootaleyda	58
Qeybta Tobanaad	Waxyaabaha Saameeya Waditaanka Mootada	62
Qeybta Kow iyo Tobanaad	Gawaarida Sadaxda Lugood leh.....	64
	Dhaqamada guud ee lagu wado mootooyinka sadax	
	lugood leyda iyo kuwa fadhiga dheeriga wato	64
	Dabeecadaha goonida ee mootooyinka sadax lugoodka	65
	Dabeecadaha goonida ee mootooyinka fadhiga dheeriga	
	dhanaca ku wato	66
Qeybta Labo iyo Tobanaad	Su'aalaha tusmada ah ee tijaabada aqoonta	69
Lifaaqa	70	
	MSF – TALOOYIN FUDUD: Talooinka Guud ee Qaabka Badbaado	
	U Wadista Mootada.....	71
	MSF – LIISKA TOBANKA SHEY EE BADBAADADA DHABTA	72
	MSF – Aasaaska Badbaadada Mootada <i>Dooqa Wadaha™</i>	
	Heshiiska Badbaadada	73

Mooto wadista waa khibrad gaar ah. Marka loo eego baabuur, kuma fadhiisanaysid un mootada ee waad ka qeyb noqtaa. Mooto wadiddu ma aha sida gaari wadid sahan, ee waa wadid hawl badan, oo la laabanayo leex-leexyo adag oo isxigxiga, hadbana la jaan-qaadaya sida wadada u taal; marsho baddelidda, shaalaraynta, iyo bareeg qabashada saxda ah. Haddi aad u kaxaysato shaqada kagana timaado ama saaxiibo koox ah la wado dhamaadka isbuuca, moota wadista waxay u baahan tahay dhamaan dareenkaaga waxa ayna abuurtaa dareen xoriyad kicin leh.

Xoriyaddaas se, waxaa weheliya mas'uuliyad. Dhammaan gobolada waxay u baahan yihii nooc ka mid ah ayididda shatiga taasoo muujinaysa inaad leedahay ugu yaraan heerka xirfadda iyo aqoonta. Waqtii u qaado inaad barato sida loo isticmaalo mootada oo hel khibrad badan oo wadista ah. Raadso khibradle mas'uul ah ee mootada si uu kuugu hago waxbarashadaada. Khibradan latalinta iyo wadidda ayaa kuu diyaarin doonta inaad la qabsato deegaanka taraafikada ee maanta oo Aad yarayso suurtgalnimada shil. Dhammaan wadayaasha waxaa lagu dhiirigelinayaan



Qaybtaan waxay ka hadleeysa

- Mooto ayididda
- Ogolaanshaha barashada ku meel gaarka ah
- Tijaabada xirfada wadaha
- Barnamijka Waxbarashada Wadaha ee Michigan
- Cusbooneysiinta shatiga darawalnimadaada

inay ka soo qaybgalaan koorsada waxbarasho ee heerka bilowga ee bixinaysa macluumaadka iyo tababbarka gacan-ku-qabashada ah ee loo baahan yahay si loo helo ayididda mootada. Wuxaad baran doontaa sida loo horumariyo xirfadahaaga fuulista iyo xeeladaha maskaxeed, si aad u noqoto Wade badbaado leh, oo feejigan. Buugan iyo daabacaadaha kale ee mootooyinka ayaa kaa caawin kara inaad u diyaargarowdo inaad guulaysato.

Mooto ayididda



(1) Qofku, ka hor inta uusan ku kaxayn mooto, aan ahayn mooto-shirreey, waddo dadweyne ama waddo weyn, waa in uu soo iibsadaa ayididda mootada shatiga wadaha ama shati wadid...

(4) Qofka jebiya farqada (1) waxa uu ku muteysanaya fal-dambiyeed ciqaabeed sida soo socota:

(a) Xadgudubka koowaad, xadhig aan ka badnayn 90 maalmood ama ganaax aan ka badnayn \$500.00, ama labadaba.

(b) Xadgudubka dhaca ka dib xukun hore, ee xadhig aan ka badnayn hal sano ama ganaax aan ka badnayn \$1,000.00, ama labadaba.

MCL 257.312a.

Marka laga reebo ciqaabaha sharciga lagu sheegay, mootada waa la jiidan karaa oo waa lala wareegi karaa. Aan runta ka hadalno, adiga oo aan lahayn **ayidaad** ayuu sarkaal sharci fulinta kugu joojiyay wadada. Ka dib joojinta taraafikada, si sharci ah uguma wadi kartid mootada gurigaaga, oo inaad ku baarkinto wadada dhinaceeda ilaa aad ka samayn karto

qabanqaabada in laguu qaado baaskiilkaaga ayuu halis u galinaya inuu tuugo xado ama la waxyeeleeyo. Jiididda iyo la wareegidda mootadaada waa natijio macquul ah haddii lagugu qabto adigoo kaxaynaya iyadoon laguu ayidin.



Ayididda mootada saddexda lug leh

Ayididda loo bixiyaa si loo wado mootada saddexda lugood leh, oo aan ahayn mooto-shirreey, waxay ku xaddidan tahay hawlgalkaas mana sharchiyaynaysa wadidda mootada labada lug leh. MCL 257.312b (3).

*Xeerka Xaddidaadda Shatiga Saddexda Lugoodka: 20



Codsashada ayididda mootada

Si aad mooto ugu wado waddooyinka dadweynaha, waa inaad haysataa shatiga darawalnimada ee Michigan oo ansax ah oo leh ayididda mootada. Qiiimaha ayididda mootada waxaa lagu daraa lacagta shatiga darawalnimada ee caadiga ah. Taageerada mootada waxaa laga yaabaa in lagu helo iyada oo si guul leh loo dhammaysanaya koorsada waxbarashada wadaha mootada ama imtixaanka xirfada wadaha (taas oo ay ku jирто tijaabada aqooneed qoran oo laga bixiyo xafiiska Xoghayaha Gobolka). Shuruudaha lagu helo ayididda mootada way ku kala duwan yihiin dhalinyarada iyo dadka waaweyn.

- **Michigan.gov/Motorcycling** si aad uhesho koorsada waxbarashada wadidda mootada.
- **Michigan.gov/MotorcycleTest** si aad u hesho ganacsiga tijaabiya darawallada oo qaado imtixaanka xirfada wadida.

Dhalinta

Si aad u codsato taageerada mootada, waa inaad ahaataa ugu yaraan 16 oo:

- Haysataa Shatiga Darawalka Qalingabiyay ee Heerka 2 ama Heerka 3 ansax ah.
- Si guul leh u dhammaystir koorsada waxbarashada wadaha mootada ee la ansixiyay.
- Booqo xafiiska Xoghayaha Gobolka oo soo bandhib shahaadada dhammaystirka koorsada waxbarashada wadaha mootada oo ka gudub imtixaanka aragga. Saxeexa waalidkaaga ama mas'uulkaaga sharciga ah aaya loo baahan yahay haddii aad ka yar tahay da'da 18.

Dadka Waaweyn

Si aad u hesho taageerada mootada adiga oo qaadanaya koorsada waxbarashada wadaha mootada, waa inaad:

- Si guul leh ugu gudub koorsada waxbarashada wadaha mootada.
- Ballan booqasho ka qabso xafiiska Xoghayaha Gobolka. Wuxa kale oo aad ku dari kartaa ayididdaada mootada shatigaaga adiga oo isticmaalaya adeegyada onlaynka ah ee waaxda ee barta Michigan.gov/SOS ama xarunta iskaa-udeegidda haddii aad u qalanto.
- Kagudub tijaabada aragga.
- Bixi kharashka ayididda mootada.

Ogolaanshaha barashada mootada ee ku meel gaarka ah

Si aad u hesho ayididda mootada adigoo qaadanaya imtixaanka xirfada wadaha ee laga qaato ganacsiga tijaabinta darawalnimada, waa inaad:

- Jirtaa ugu yaraan da'da 18.
- Haysataa shatiga darawalnimada oo ansax ah.
- Ka gudub tijaabada aqoonta qoran iyo imtixaanka aragga ee lagu qaado xafiiska Xoghayaha Gobolka.
- Hel oggolaanshaha ku-meel-gaadhka ah ee mootada oo ku tababaro wadidda iyada oo ay kormeeraayan wadaha mootada la ayiday ilaa 180 maalmood. (Laba TIP oo keliya aaya lagu soo saari doonaa muddo 10 sano ah.)
- Ka gudub imtixaanka xirfada wadaha ee ay bixiso ganacsiga tijaabinta darawalka ee ay ansixisay Waaxda Gobolka.
- Ganacsiga tijaabinta darawalka aaya natijadaada imtixaanka u gudbin doona Xoghayaha Gobolka. Waxaa laga yaabaa inaad aado xafiiska Xoghayaha

Gobolka si aad u hesho ayididdaada. Ama haddii aad u qalanto, waxaad ka codsan kartaa ayididdaada onlayn ama xarunta isu-adeegidda.

- Bixi kharashka ayididda mootada.

Waxaa lagaaga baahan doonaa inaad qaadato koorsada waxbarashada darawalka haddii aad ku dhacdo imtixaanka xirfada wadaha mootada laba jeer.

Ujeedada ogolaanshaha waxbaridda ku meel gaadhka ah ee mootada (TIP) waa in la siiyo wadayaasha cusub fursad ay ku tababartaan ku kaxaynta waddooyinka dadweynaha iyada oo uu si joogto ah u kormeerayo wado khibrad leh ka hor inta aan la qaadin imtixaanka xirfada wadaha mootada. TIP waa un qalab ku meel gaar ah oo loo isticmaalo in lagu helo ayididda mootada ee Michigan. TIP waxay shaqaynaysaa 180 maalmood waxaana looga baahan yahay tijaabada xirfada wadaha. Laba TIP oo keliya aaya la bixin doonaa muddada 10-ka sano ah. Haddii TIP-gaaga labaad uu dhaco ka hor inta aanad qaadan imtixaanka xirfada wadidda, waa inaad ka gudubtaa koorsada waxbarashada wadista si aad u hesho ayididda mootada.

Si aad u hesho TIP-ka mootada waa inaad:

- Haysato shatiga darawalnimada Michigan oo sax ah.
- Ka gudubtaa tijaabada aragga iyo qoraalka aqooneed ee mootoooyinka.
- Bixisa kharashka TIP.

Tijaabada aragga

Waxaa lagaa qaadi doonaa tijaabada aragga si loo go'aamiyo haddii araggaagu buuxiyo heerarka ugu hooseeya. Haddii muraayadaha aragga loo baahan yahay si looga gudbo tijaabada, shatiga darawalnimadaada aaya muujin doonta inaad xidhato muraayadda aragga markaad baabuur wadato. Haddii aad ku dhacdo tijaabada aragga, khabiirka daryeelka ishaada waa inuu buuxiyaa bayaan aragtii. Bayaanka aragga wanaagsan waxaa loola jeedaa in shatiga darawalnimada lagu siin karo. Mararka qaarkood xaddidaadyo gaar ah oo wadista - sida wadista maalintii oo keliya, aaya loo baahan doonaa haddii qoraalka aragga uu muujiyo baahidaa. Haddii bayaanka aragtidu aanu fiicnayn, codsigaaga waa la diidi doonaa.

Tijaabo aqooneed

Baarithaan aqooneed oo ku saabsan badbaadada mootada oo lagu bixiyay xafiiska Xoghayaha Gobolka waa in la gudbiyaa ka hor inta aan la soo saarin TIP-ga mootada. Su'aalaha tijaabada aqoontu waxay ku salaysan yihiin maclumaadka, dhaqamada, iyo fikradaha buug-gacmeedkan. Waxay u baahan yihiin inaad ogaato oo aad fahanto qawaaniinta wadada iyo dhaqamada wadista badqabka leh. Tijaabada aqoonta iyo shuruudaha imtixaanka xirfada wadaha waa lagaa dhaafayaa haddii aad si guul leh ugu gudubtay koorsada waxbarashada wadaha mootada ee ay ansixisay waaxdu. MCL 257.309 (10).

Ku kaxaynta ogolaanshaha barashada ku meel gaarka ah

Ogolaanshaha barashada ku meel gaarka ah (TIP) waxay kuu oggolaaneysaa inaad si sharci ah ugu wado mootada muddo 180 maalmood ah. TIP ayaa u baahan inaad:

- Qaadato ruqsadda markaad wadeyso.
- Ku wadaa iyadoo si joogto ah uu kormeerayo wado mootho oo shatiyasan oo ugu yaraan 18 jir ah.
- Aad wado kaliya maalintii – wadista habeenkii looma oggola TIP.
- Ha qaadin wax rakaab ah.

Tijaabada xirfada wadaha

Tijaabooyinka xirfadaha Wadista waa qaab wanaasgan oo lagu cabbiro xirfadaha lagama maarmaanka u ah in si badbaado leh loogu wado mootada taraafikada. Qiimeyn taftaada ee xirfadahaaga kaliya kuma filna. Dadku waxay inta badan ka badbadiyaan kartidooda. Xitaa way ku adag tahay asxaabta iyo ehelka inay si buuxda daacad uga ahaadaan xirfadahaaga. Tijaabada xirfadaha wadista waxaa loogu talagalay in uu si cad u qiimeeyo tijaabaha wadidda xirfadeed oo shatiyasan. Tijaabooyinka xirfadaha wadista waxaa bixiyo ganacsiyada tijaabada darawalka ee ay ansixisay Waaxda Gobolka Michigan Khidmadaha imtixaanka waxaa dejiya kambaniga tijaabinta wayna kala duwanaan karaan, markaa hubso inaad wax ka waydiiso kharashyada markaad wacayso bixiyayaasha deegaankaaga si aad maclumaad u hesho.

Waxaad filan karto muddada tijaabada xirfada wadaha

Kuwa soo socda ayaa ah walxaha tijaabada xirfadaha loo baahan yahay iyo qiyaasaha waqtiyada ee tijaabada. Waqtiyada qoondaysan waa qiyaasaha ugu yar. Booqo websaydka waaxda ee [Michigan.gov/Motorcycling](#) wixii macluumaa dheeraad ah.

- Gawaari Baaridda – 5 daqiqiyo, lama qiimeeyo.
- Xirfadaha xakamaynta aasaasiga ah ee xadka - 10 daqiqiyo, waa la qiimeeyaa.

Inta lagu jiro tijaabada xirfada wadista, imtixaan qaadayaasha la ansixiyay waa in had iyo jeer:

- U akhriyaan tilmaamaha caadiga ah ee qayb kasta oo ka mid ah tijaabada arday kasta (ujeedkaani awgeed waxaa la siiyaa imtixaan qaadaha liistada tilmaamaha).
- Adeegso kaliya tijaabooyinka waddooyinka ka baxsan ee waaxda ay ansixisay.

Kahor intaadan samayn tijaabada xirfadaha wadista, waa inaad:

- Haysataa mooto si sharci ah u qalabaysan oo diiwaan gashan.
- Xiro qalabka saxda ah, oo ay ku jiraan koofiyadda Waaxda Gaadiidka (DOT-ga) ee Maraykanku ansixisay, oo calaamadaysan, oo si sax ah loo xiray. Tijaabada xirfadaha lama qaban doono hadaadan xirneyn koofiyadda mootada ee la ansixiyay.

Si aad mooto ugu kaxayso tijaabada xirfadaada, waa inaad xirataa koofiyad ay Waaxda Gaadiidka ansixisay, waa inaad haysataa TIP-ka mootada oo ansax ah waana inuu ku kormeeraa marwaliba wade mooto shatiyaysan ee ugu yaraan 18 jir ah.

Tijaabinta xirfadaha mootada ee ay ansixisay Waaxda Gobolka waxa uu ka kooban yahay toddobo leyli oo lagu qiyaaso awooddaada in aad xamili karto mootada, oo ay ku jiraan kicinta, shaalaraynta, leexinta iyo joojinta. Tijaabada, ku yaal bogga 5, wuxuu ka kooban yahay afar leyli oo wadista oo qiimeynaya xirfadaha xakamaynta mootada iyo ka fal-celinta khatarta waxayna qaadan doontaa ilaa 15 daqiqiyo in

la dhammaystiro. (isla layliyadan xadeed ayaa sidoo kale loo isticmaalaa in lagu qiimeeyo xirfada wadista ee koorsooyinka waxbarashada aasaasiga ah ee wadista mootada.)


Matoor Joogsiga: Tani waxa la qiimeeyaa inta lagu jiro tijaabada oo idil. Dhibcaha ayaa la qiimeeyaa mar kasta oo uu kaa joogsado matoorka inta lagu jiro leyli kasta.

Tijaabada mootada labada lugood leh waxa la qaadi karaa laba jeer. Isku dayga labaad ee tijaabada lama jadwaleyn karo illaa ugu yaraan 24 saacadood ka dib isku dayga koowaad waana in la dhameystiraah kahor inta TIP-ka uusan dhicin.

Haddii aadan ka gudbin isku daygaaga labaad ee tijaabada, waxaad heli doontaa ogeysiis dhicid ah waxaana lagu fari doonaa inaad ku gudubto Koorsada Aasaasiga ah ee MSF si aad u hesho ayididdaada mootada Michigan.

Ma jiro wax xaddidaad ah ee khuseysa inta jeer ee la isku dayi karo tijaabada mootada saddexda lugood leh. Waqtiga sugitaanka ee 24-saacadood ah ee u dhaxeeya isku dayga tijaabada wuu sii jiraayaa tijaabadana lama qaadi doono haddii TIP uu dhaco.

Dhamaystirka guusha leh ee afartan xirfadood ee wadista mootada ayaa loo baahan yahay si looga gudbo koorsada waxbarashada aasaasiga ah ee mootada ama tijaabada xirfada wadista.



- 1. Leex-leexashada bartilmameed iyo joogsiga caadi ah:** Ka leex-leexo shan bartilmameed oo taxane ah oo 12 fiit kala fog oo samee joogsi deggan adigoon simbirxan, oo taayirka hore ee mootada uu ku taagan yahay calaamadda afar-geeska ah.
- 2. Midig u leexasho joogsi kadib:** Ka dhaqaaq joogsiga adoo isla markaaba sameynaya u leexanaya midig. Kadib, waxaad u leexata dhanka bidix ee bedka calaamadeysan. Kuwa kaxeyya mootooyinka ka sareeya 600 cc waxaa loo oggol yahay bed weyn oo ay ku sameeyaan wareegga. Mootooyinka 600 cc ama ka yar waxay haystaan bed wareeg yar.
- 3. Joogsiga deg-dega ah:** Ku shaalaree waddo toosan oo ku calaamadaysan caagagga toobinnada, ka dibna u jooji mootada sida ugu dhakhsaha badan uguna nabdoon ee ugu macquulsan.
- 4. Ka leexleexashada jid-gooyeasha:** Ku shaalaree waddo toosan oo ku calaamadaysan caagagga toobinnada, ka dibna leexo si aad uga fogaato xariiq jid-goyn oo kadibna leexo si add uga fogaato dhinacyada ee leyliga.

Shuruudaha ganacsiga ee ganacsiyada tijaabinta darawalnimada

Ganacsiyada tijaabinta darawalnimada waa inay u hoggaansamaan dhaqamada ganacsiga qaarkood ayna maareeyaan tijaabooyinka xirfadaha wadista iyadoo loo eegayo heerarka iyo habraacyada ku jira heshiis rasmi ah, sharci ah oo lala yeesho waaxda.

Sida ku cad Xeerka Gawaarida ee Michigan (Xeerka Dadweynaha 300 ee 1949), waa dembi:

- In aad sameyso caddeyn been ah oo ku saabsan dalabka laysanka darawalnimada.
- In la laaluusho ama la isku dayo in la musuqmaasuqo qof ama hay'ad sameysa tijaabada wadista iyada oo ujeedadu tahay in la saameeyo aragtida ama go'aanka tijaabiyyaha.
- In sarkaalka tijaabinta ee sameeya tijaabada wadista iyadoo la raacayo heshiis lala galay Waaxda Gobolka uu ay ka duwo, gaabiyoo ama si kale u beddello habka ama shuruudaha tijaabada ee lagu qeexay heshiiskaas.
- In qofka uu been abuuro, mid la mid ah sameeyo ama beddello shahaadada tijaabada wadista ee uu soo saaray sarkaal tijaabin oo loo xilsaaray.

Dembiga culus oo lagu galay sharciyadan waxaa lagu cizaabayaa hal ilaa shan sano oo xabsi ah iyo ugu badnaan \$ 5,000 ganaax dembiga ugu horreeya. Xukunnada xiga waxay keenayaan ganaaxyo dheeraad ah.

Musuqmaasuqidda tijaabinta

Sharciga Michigan wuxuu amrayaa in:

- Mid kasta oo ka mid ah shirkadaha tijaabiya darawalnimada ama bixiye waxbarasho darawalka mooto ee si ula kac ah u beeniya imtixaanka xirfadaha wadista isagoo meesha ka saaraya wixii shuruud ah ama nidaam ah, ama ka qaybqaata waxqabad kasta oo sharci darro ah oo la xiriira shati bixinta darawalka, waxa uu marayaa cizaab daran. Kuwaas waxaa ka mid ah luminta oggolaanshaha tijaabada, dacwad-ku qaadidda dambiyada iyo dib u soo celinta khasaaraaha lacageed ee soo gaara codsadaha tijaabada waaxda ama labadaba.
- Qof kasta, oo uu ku jiro imtixaan qaadaha ama codsadaha, oo si bareer ah u dhiirigeliya, fududeeya ama ka qaybqaata imtixaan darawalnimo oo aan habboonayn, sharci-darro ah ama khiyaano ah ayaa sidoo kale lagu soo oogi doonaa dacwad dembi.
- Qof kasta oo lagu helo in si khaldan, sharci darro ah ama si been abuur ah loo tijaabiyyay waa inuu mar

kale qaataa imtixaanada habboon. Khidmadda dib-u-tijaabinta waa lagu soo oogi karaa codsadaha.

- Tijaabooyin laysanka darawalnimada ee aan habooneyn, khiyaano ama sharci darro ah ayaa ka dhasha codsiyada liisanka sharci darrada ah.

Soo warbixinta wax aan habooneyn, sharci darro ah, ama hawlo tijaabo ah oo been abuur ah

Haddii aad ogtahay wax ah hawlo tijaabin oo aan habooneyn, sharci darro ah ama khiyaano ah, isla markiiba u sheeg Waaxda Gobolka. Fadlan hubi inaad ku dartid magacyada dadka iyo hay'adaha ku lugta leh, taariikhda dhacdada iyo sharaxaad faahfaahsan oo ku saabsan hawlaha la arkay ama laga hadlay. Dhammaan warbixinnda sharciga ah waa la baari doonaa. Warbixin qoraal ah ayaa laga yaabaa in loo baahdo. Macluumaaqdan waa in loo gudbiyaa:

Michigan Department of State
Driver Education and Testing Section
Richard H. Austin Building
430 W. Allegan St., 3rd Floor
Lansing, MI 48918
Taleefanka 517-241-6850
Fakis 517-335-3155
MDOS-drivertesting@Michigan.gov

Barnaamijka Waxbarashada Wadaha ee Michigan

Maamulka Barnaamijka Waxbarashada Wadaha ee Michigan (MI-REP) waa qayb muhiim ah oo ka mid ah hadafka badbaadada taraafikada ee Wasaaradda Gobolka Michigan Barnaamijka Michigan wuxuu adeegsadaa heerarka amniga ee ay dejisay Aasaaska Badbaadada Mootada (MSF) si loo hubyo tababar isku-jaango'an oo dhameystiran. Dhamaan wadayaasha mootada waa inay dhammaystiraan fasalka waxbarashada mootada ama ay ka gudbaan imtixaanka aqoonta iyo imtixaanka xirfadaha wadista si ay u helaan ayididda mootada, kaas oo looga baahan yahay in si sharci ah loogu wado waddooyinka dadweynaha iyo jidadka waaweyn. Wadayaasha si guul leh u dhammeeya koorsada waxbarasho ee la ansixiyey ayaa buuxiyay dhammaan shuruudaha gobolka ee helidda ayididda mootada. Koorsooyinka waxaa loogu talagalay wadayaasha cusub iyo kuwa khibrada leh. MI-REP waxay ka caawisaa wadayaasha inay yeeshen asaas wanaagsan ee garashada, xirfadaha iyo khibradda looga baahan yahay inay si nabab ah u wadaan mooto. Wadayaasha dib u baranaya wadidda ama kuwa khibrada leh waxay sidoo kale ka faa'iideysan karaan tababarka iyagoo cusbooneysiinaya ama xoojinaya xirfadaha lagama maarmaanka u ah moota wadidda badbaadada leh. Caymis bixiyaasha qaarkood waxay bixiyaan qiimo dhimis khidmadaha caymiska mootada ee loogu talagalay dadka dhameystiray koorsooyinkan. Booqo Michigan.gov/Motorcycling si aad u hesho koorsada waxbarashada wadaha mootada ee kuu dhow.



Koorsooyinka waxbarashada ee wadaha mootada

Koorsooyinka waxbarashada ee wadaha mootada waxaa bixiya kafaala-qaadayaasha gaarka ah iyo kuwa guud ee gobolka oo dhan inta lagu jiro xilliga mootada. Kharashyadu way kala duwanaan doonaan, iyadoo ay ku xirantahay bixiyaha. MI-REP waxay bixisaa dhowr koorsooyinka waxbarashada ee wadaha mootada ah oo heerar xirfadeed oo kala duwan ah. Dhammaan koorsooyinka waxbarashada ee wadaha mootada waxaa bara macalimiinta Rider (RiderCoaches) ee shahaadada leh.

- **Koorsada Wadaha ee Aasaasiga ah (BRC):** BRC waxay ka kooban tahay barida fasalka iyo wakhtiga layliga ee wadidda iyadoo la adeegsanayo mootooyinka tababarka BRC. Uma baahnid inaad leedahay mooto si aad u qaadato BRC. Saddex maalmood oo waxbarid iyo tababar ah kadib, tijaabada aqoon qoraal ah iyo tijaabo xirfadeed waddid ah oo ku saabsan baaxadda aaya la bixiyaa. Waa inaad si guul leh ugu gudubtaa labada tijaabo si aad u hesho shahaadada BRC ee dhammaystirkha oo aad u codsato ayididda mootada.
- **Koorsada Waddida Aas-aaska 3-Lugood (3WBRC):** Koorsada Waddida Aas-Aaska 3-Lugood Ah waa qaab wanaagsan oo loogu talagalay wadayaasha mootooyinka inay wax ka bartaan wadista-mootada seddexda lug leh. Koorasku waxay ka kooban tahay afar saacadood oo waxqabadyo fasalka ah iyo ilaa siddeed saacadood oo ah leyli moota-wadis. Waa inaad ka gudubtaa tijaabada aqoonta qoran iyo tijaabada xirfada wadista si aad si guul leh ugu dhammaystirto 3WBRC. Shirkadaha caymisyada qaarkood aaya laga yaabaa inay qiimo dhimis u sameeyaan caymiska mootada wadayaasha qaata shahaadada dhammaystirkha. Inta badan 3WBRCs waxay u baahan yihiin ardaydu inay isticmaalaan mootadooda saddexda lug leh, ka hubi bixiyaha ka hor intaadan iska qorin fasalka. Haddii aad isticmaasho mootadaada saddexda lugood leh, waa in si habboon loo caymiyay, loo calaamadeeyay oo loo diwaangeliyay, muujisaaa taariko liisan oo sax ah, oo ay ka gudubtaa baaridda badbaadonimo. Ayididda mootada saddexda lugood leh looma isticmaali karo in lagu wado mootada laba lugood leh.
- **Koorsada Waddida Aasaasiga ee Labaad (BRC2) iyo Koorsada Dib u bartaha Wadidda Asaasiga ah (RRBRC),** Labadan koorso waxaa loogu talagalay wadayaasha hore u lahaa xirfadaha

wadidda ee aasaasiga ah. Waxay lamid yihii BRC marka laga reebo in xawaaraha uu ka sareeyo oo waxaana lagaaga baahan yahay inaad la timaadaa mootadaada. Si guul leh u dhamaystiridda koorsoooyinkan waxay kuu ogolaaneysaa inaad aado xafiska Xoghayaha Gobolka si aad u hesho ayididda mootada bedelka aad ka qaadan lahayd tijaabada xirfada wadaha. Barnaamijyadan hal maalin-laha ah waxaa ka mid ah Koorsada Wadaha Aasaaska (BRC). Waxay ku wanaagsan yihii muraajicaynta ku tababarashada iyo dib-u-cusboonaysiinta xirfadaha wadidda. Wuxuu qofka dhagaha culus iyo dhagoolayaasha waa inay la xiriiraan Adeegga Isgaarsiinta Michigan ee 711 ama Qeypta Michigan ee Dhagoolaha, Dagoole-Indhoole iyo Dhagaha culus lambarka 313-437-7035 ama doddbh@michigan.gov.

- Koorsooinka Wadista ee Horumarsan (ARC)** Koorsa hal-maalil ah oo kaabaysa xirfadaha aasaasiga ah ee wadaha oo ka caawinaysa qiimaynta khatarta shakhsiyeed. Waxa kamid ah casharo la boobsiiyo oo leh dhawr hawlood oo is dhexgal ah si loo horumariyo aragtida iyo ogaanshaha khataraha. Leelisyada wadidda waxay kor u qaadaan xirfadaha aasaasiga ah iyo xirfadaha ka hortagga shilalka labadaba. Wanaajinta bareegga iyo hab-sami leh u kala firaynta ayaa xooga la saaraa. Koorsadu waxay faa'iido u leedahay wadayaasha nooc kasta oo mooto waddeed ah. ARC-da waxaa loogu talagalay wadayaasha horay u haystay ayididda oo raba inay xoojiyaan xirfadahooda wadista. Ardaydu waa inay la imaadaan mootadooda iyo caddaynta caymiska. Mootada waa in si sax ah loo caymiyay, loo magaceeyay oo loo diwaan galiyay, muujiyya taariko sax ah oo ay ka gudubtaa baaridda badbaadada.

Baddelka barnaamijyada tababbarka wadayaasha mootada ee ka baxsan gobolka

Wadayaasha Michigan ee codsanaya ayididda mootada, kuwaas oo dhammaystiray koorsa tababar oo ka baxsan Michigan, waa inay ku soo gudbiyaan kaarkooda badbaadada mootada ee gobolka ka baxsan xafiska Xoghayaha Gobolka ka hor inta aan la soo saarin ayidid. Shuruudda ah in laga gudbo tijaabada xirfadaha moota wadidda ama koorsada waxbarashada moota wadidda ayaa laga yaabaa in aan loo baahan markaa. Wixii macluumaad dheeraad ah, booqo **Michigan.gov/Motorcycling**

Tixgeliinnada loogu talagalay dadka naafada ah iyo kuwa aan ku hadlin Ingiriiska

Mi-REP iyo kafaala-qaadayaasha tababarka waxbarashada wadidda mootada waxay u hoggaansamaan Sharciga Naafada Mareykanka iyo Sharciga Xuquuqda Madaniga ah ee Dadka Michigan ee Naafada ah. Haddii aad u baahan tahay tixgelin ama laguu diiday adeegyo, wac 888-SOS-MICH (767-6424). Macaamiisha Dhagaha culus iyo dhagoolayaasha waa inay la xiriiraan Adeegga Isgaarsiinta Michigan ee 711 ama Qeypta Michigan ee Dhagoolaha, Dagoole-Indhoole iyo Dhagaha culus lambarka 313-437-7035 ama doddbh@michigan.gov. Dhagoolaha iyo qofka dhagaha culus wuxuu isticmaali karaa turjumaan luqadda dhagoolaha inta lagu jiro koorsada waxbarashada wadaha. Xarunta Waaxda Macluumaadka Gobolka waxay ku siin kartaa liis turjubaano haddii aad wacdo 888-SOS-MICH (767-6424). Ardaygu waxa uu keeni karaa tarjumaan luuqad qalaad si uu ugu turjumo casharada fasalka dhexdiisa iyo tababarka wadidda. Dhammaan turjubaanada waa inay jiraan ugu yaraan 16 sano. Turjubaanku waa inuu RiderCoach jooga goobta tababarka tusaa laysanka darawalka ama aqoonsi sawir leh. RiderCoach waa inuu diiwaangeliya magaca turjubaanka iyo macluumaadka aqoonsiga.

Shuruudaha ganacsieed ee bixiyeyaasha waxbarashada wadista

Bixiyeyaasha waxbarashada wadista waa inay u hoggaansamaan dhaqamada ganacsiga qaarkood iyo heerarka ay dejiyeen Aasaaska Badbaadada Mootada iyo Mi-REP. Bixiyeyaasha waxbarashada wadidda waa in:

- Ay ansixiso Waaxda Gobolka ka hor inta aan adeegyada la bixin.
- Shaqaalaysiyyaan kaliya RiderCoaches ay shahaado siisay Aasaaska Badbaadada Mootada.
- Lahaadaan goob ganacsiga oo dhisan oo helaan ogolaansho qoraal ah si ay u isticmaalaan dhammaan goobaha tijaabada ee la ansixiyay.
- Daabacaan khidmadda oo qoran iyo nidaamyada lacag-celin oo ay bixisaa rasiidhada. Khidmada tijaabinta waxaa bixiyayaasha dadweynaha iyo bixiyaha adeeg bixiyayaasha gaarka ah u dejiya sharciga gobolka.
- Lahow caymiska masuuliyadeed.

Shuruudaha diiwaangelinta mootada ee Michigan

Dadka deggan Michigan waxaa looga baahan yahay inay ka diiwaangeliyaan mootoooyinka Xoghayaha Gobolka si ay si sharci ah ugu wadaan waddooyinka dadweynaha. Si aad ugu hesho diwaan gelinta Michigan mootadaada, ka qabso ballan booqasho xafiiska Xoghayaha Gobolka. Waxaad u baahan doontaa inaad waxyaabaha soo socda u soo qaadatid ballantaada:

- Aqoonsigaaga.
- Caddaynta caymiska ee ugu yaraan \$20,000/\$40,000 mas'uuliyadda dadwaynaha iyo \$10,000 caymiska waxyeelada hantida.
- Caddaynta Lahaanshaha mootada.
- Bixinta kharashka diiwaangelinta. Xafiisyada Xoghayaha Gobolka waxay aqbalaan lacag caddaan ah, jeeg, money orders iyo American Express, Discover, MasterCard iyo kaararka Visa credit and debit.

Dib u cusboonaysiinta diiwaangelinta mootada

Waxaad heli doontaa ogeysiis ah cusboonaysiinta 60-90 maalmood ka hor inta aanay dhicin diiwaangelinta mootada. Ogeysiiskaagu wuxuu sheegi doonaa haddii caddaynta caymiska loo baahan yahay marka la cusboonaysiinayo.

Laga bilaabo Oktoobar 1, 2022, dib u cusbooneysiinta onlaynka ah waxay ku siineysaa ikhtiyaar aad ku cusbooneysiin karto diiwaangelinta mootada labadii sanoba mar halkii aad ka samayn lahayd sannad kasta. Milkiiliyaasha mootada ee doortay diiwaangelinta laba sano ah kuma imaan doonaan wax isbeddel ah khidmaddooda diiwaangelinta laakiin waxaa lagu soo dalaci doonaa laba diiwaangelin (hal sannad kasta) markay cusbooneysiinayaan.

Cusbooneysiinta shatiga darawalnimadaada

Shatiga darawalnimadu wuxuu shaqeynayaa afar sano wuxuuna dha-cayaa maalinta dhalashadaada, sida lagu muujiyyat taariikhda dhicitaanka ee ku taal midigta sare ee shatigaaga.

Waxaad heli doontaa ogeysiis cusboonaysiin ah 60-90 maalmood ka hor inta aanu shatigaagu dhicin. Cusbooneysiin waqtigii loogu talagalay si aad uga fogaaato janaaxa daahidda. Waa sharci darro in lagu wado shati dhacay.

Bixinta Lambarka Sugnaanta Bulshada

Sharciga Michigan wuxuu uga baahan yahay Xoghayaha Gobolka inuu ururiyo oo xaqijiyo lambarada Sugnaanta Bulshada ka hor inta uusan bixin shatiga darawalnimada

ama Aqoonsiga Gobolka. Lambarada Sugnaanta Bulshada waxaa loo isticmaalaa aruurinta taageerada carruurta iyo inay gacan ka geystaan xaqijinta aqoonsiga.

Haddii aad ku guul dareysato inaad bixiso Lambarka Sugnaanta Bulshada oo sax ah ama caddaynta SSA ee muujinaysa u-qalmitaan la'aantaada, shatiga darawalnimadaada ama codsigaaga Aqoonsiga gobolka lagama hawlgeeli karo. Intaa waxaa sii dheer, bixinta macluumaaadka been abuurka ah ama marin habaabinta ah ee SSA waxaa laga yaabaa inaad ku muteeysto xarig hal ilaa shan sano ah, ganaax dhan \$500 ilaa \$5,000, ama labadaba. Shatigaaga ama ogolaanshahaaga sidoo kale waa la joojin doonaa.

Ku cusbooneysiinta shatigaaga darawalnimadaada qaab onlayn ah

Hubi ogeysiiskaaga cusboonaysiinta si aad u aragto haddii aad xaq u leedahay inaad dib u cusboonaysiiso addoo isticmaalaya adeegyadaya onlaynka ah ee **Michigan.gov/SOS**. Ku bixi American Express, Discover, MasterCard ama Visa ama e-check.

Kharashka habaynta ayaa lagu dalaci doonaa adeegsiga kaararka debit iyo credit.

Ku cusboonaysiinta shatiga darawalnimadaada boostada

Ogeysiiska cusboonaysiintaada wuxuu sheegi doonaa inaad u qalanto inaad dib ugu cusbooneysiiso shatiga darawalnimadaada boostada. Ku bixi jeeg ahaan ama money order. Ku soo celi ogeysiiskaaga cusboonaysiinta iyo lacag bixinta baqshadda soo celinta ee ku lifaaqan. U oggolow ugu yaraan laba toddobaad geynta boostada marka aad direyso ogeysiiska cusboonaysiinta.

Ku cusbooneysiinta shatiga darawalnimadaada si shakhsiyeed

Sida ku cad isbeddelka sharciga gobolka, waxaad ka cusboonaysiin kartaa shatigaaga darawalnimada xafiiska Xoghayaha Gobolka 12kii sanoba mar halkii aad ay ka ahaan lahayd 8dii sanoba mar. Ogeysiiska cusboonaysiintaada wuxuu tilmaamayaa inay qasab tahay inaad aado xafiiska Xoghayaha Gobolka si aad u cusbooneysiiso. Sawir cusub ayaa la qaadi doonaa waxaana la qaadi doonaabaarista araggaa. Dhammaan xafiisyada Xoghayaha Gobolka waxay aqbalaan lacag caddaan ah, jeeg, money orders, American Express, Discover, MasterCard iyo kaararka Visa debit iyo credit. Khidmadda hawl-galinta ayaa la bixin doonaa marka la isticmaalayo kaarka debit ama credit.

Beddelka cinwaanka

Sharciga Michigan wuxuu u baahan yahay in cinwaanka shatigaaga darawalnimo, oo ah meesha aad degan tahay, uu noqdo isla cinwaanka kaarkaaga diiwaangelinta cod-bixiyaha ku qoran. Wuxaa laga heli karaa onlayn) ama xafis kasta oo Xoghayaha Gobolka ah. Wax khidmad ah lagaagama qaadayo adeeggan.

Saacadaha shaqada

- Isniin, Talaado, Khamiis, iyo Jimco, 9 subaxnimo ilaa 5 galabnimo. Waqtiga Bari, (8 subaxnimo - 4 galabnimo Waqtiga dhexe)
- Arbacada, 11 subaxnimo ilaa 7 galabnimo Waqtiga Bari, (10 subaxnimo ilaa 6 galabnimo Waqtiga dhexe)
- Xafisiyada yaryar ayaa laga yaabaa in la xiro saacada qadada dhammaan xafiisiyaduna way xiran yihiin fasaxyada gobolka

Talooyin marka la cusboonaysiinayo:

- Onlayn ahaan – Cusboonaysiinta onlaynku waa hab haboon oo wakhti kaaga dhumin oo lagu cusboonaysiyo. Booqo adeegyada onlaynka ah ee laga helo websaydka Xoghayaha Gobolka ee Michigan.gov/SOS si aad u aragto dhammaan fursadaha adeegga ee jira.
- Saldhigiyada isu-adeegidda – In kabadan 160 saldhig–oo isu-adeegid ayaa ku yaal Michigan iyo meelaha tafaariiqda qaarkood, sida Meijer, Kroger iyo 7-Eleven. Celceliska hawl-dhacyada wuxuu qaadanayaa wax ka yar laba daqiqiyo iyadoo tabkaaga iyo diiwaangelinta mootada ayaa isla markiiba la bixiyaa.
- Boosto ahaan – Baqshad soo celin oo cinwaan ku qoran yahay ayaa la soo raaciyya ogeysiiskaaga cusboonaysiinta si ay kuugu fududaato.
- Si shakhsiyeed ahaan - Ka qabso ballan booqasho xafis un ka mid ah xafiisiyada Xoghayaha Gobolka si aad si shakhsiyeed ugu cusboonaysiiso. Macaamiisha ballan la'aanta ku yimaada waxa la qaabili doonaa hadba haddii wakhtiga iyo culayska shaqada ee xafiisku suuragaliyo, ama shaqaaluhu ayaa kaa caawin doono qabsashada booqasho labaad.
- Kaaraka Debit iyo credit - American Express, Discover, MasterCard, iyo Visa ayaa laga aqbalaan dhammaan xafiiska Xoghayaha Gobolka, onalayn ahaan ah, iyo ma-xarumaha isu-adeegidda. Lacag hawl-gelin ayaa lagu dalaci doonaa.
- Lacag caddaan ah, jeegag ama money orders - Jeegag iyo money orders ayaa la isticmaali karaa marka boosto ahaan ama xafiiska Xoghayaha

Tijaabi aqoontaada

Dooroo beddelka (A, B ama C) ee sida ugu fiican uga jawaabaya su'aasha.

1. Si aad ugu wado mootada si sharci ah wadooyinka dadweynaha ee Michigan, waa inaad haysataa:

- A. Shatiga darwalnimada.
- B. Shatiga darawalka khaaska ah.
- C. Ayididda mootada (CY).

2. Qofka leh ogolaanshaha barashada ku meel gaarka ah ee mootada waa inuu:

- A. Had iyo jeer wataa ogolaanshaha marka uu ka xeenayo mootada.
- B. Ku wadaa isagoo uu u kormeerayo si joogto Wade mootho oo shatiga leh ee jira da'da 18 ama ka weyn.
- C. Marna uusan wadin habeenkii uusanna qaadin rakaab.
- D. Dhammaan inta kor ku xusan.

3. Immisa ogolaansho waxbarasho oo ku meel gaar ah ayaa sharciga Michigan ogol yahay?

- A. In alla intii loo baahnaa ilaa uu waduhu si guul leh uga gudbo tijaabada xirfadaha wadista.
- B. Laba ogolaansho gudaha 10-sano.
- C. Laba ogolaansho sanad walba.

1. C – bogga 2, Codsashada ayididda mootada

2. D – bogga 3, Ku wadidda ogolaanshaha waxbarashada ku meel gaarka ah (TIP)

3. B – bogga 3, Ku wadidda ogolaanshaha waxbarashada ku meel gaarka ah (TIP)

Gobolka dib looga cusboonaysiinayo. Xafiisiyada sidoo kale waxay aqbalaan lacag cadaan ah.

• Diiwaangelinta baaburta iyo mootada iyo tabsiyada ayaa isla markiiba la soo saarayaa marka laga cusboonaysiyo xarunta isu-adeegidda ama xafiiska Xoghayaha Gobolka. Diiwaangelinta iyo tabooyinka boosto ahaan dib loogu cusbooneysiyyay ayaa imanaya 30 maalmood gudahood.

Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan tixraac ogeysiiskaaga cusboonaysiinta, booqo barta internetka ee Xoghayaha Gobolka ee **Michigan.gov/SOS** or call 888-SOS- MICH (767-6424).

Sharciyada Mootooyinka ee Michigan

Qaybtani waa ururinta sharciyada Shuruucda Isku-dhafan Michigan (MCL) ee khuseeya isticmaalka mootooyinka. Kuwani maaha MCL-yada dhamaystiran waxaana halkan lagu bixiyaa tixraac ahaan si laguugu fududeeyo. Sharciyadani waa ay isbedeli karaan, ka eeg websaydhka Sharci-dejinta Michigan ee shuruucda ugu dambeeyay ee [Legislature.MI.gov](#)

Noocyada baabuurta labo-oyo-saddax lugoodka ah

“Mooto” waxaa loola jeedaa baabuur kasta oo leh koore ama kursi si uu u isticmaalo wadaha looguna talagalay in lagu safro iyadoo dhulka ay saaran yihiin wax aan ka badnayn 3 lugood balse aan ku jirin cagaf-cagafta.

MCL 257.31

“Mooto dhex-banaanta” waxaa loola jeedaa gaari 2- ama 3-lugood leh oo ku qalabeysan matoor aan ka badneyn 100 saddex-jibaar sentimitir biston qaata, oo aan ku xawaarayn karin xawaare ka badan 30 mayl saacaddiiba oo sagxad siman ah, nidaamkiisa wadista awoodeedna uusan u baahnayn wadaha inuu beddelo maarshada.

MCL 257.32b

“Mooto-shirreey” macnaheedu waa mooto ku qalabeysan suumanka badbaadada, isgadin-cekiye, ama saqaf-sare, gacan-qabadka ama isteerin, iyo qalabka haddii kale looga baahan yahay mootada, aan lahayn wax ka badan 3 lugood oo ku taagan dhulka isla 1 mar dhammaan, aana ku qalabeysan lugaha laga kala rito.

MCL 257.25a

Ayididda iyo Oggolaanshaha Waxbarashada Ku Meel Gaarka ah

Ku kaxeynta ogolaanshaha waxbarashada ku meel gaarka ah (TIP)

Qofka TIP haysta waxaa laga yaabaa inuu ku kaxeeyo mooto 180 maalmood waana inuu:

- Qaata ogolaanshaha.
- Wadaa iyadoo si joogto ah uu kormeerayo wado mooto oo shatiyaysan oo ugu yaraan 18 sano jiro.

- Kaxaynin mootada habeenkii.
- Rakaab ku kaxaynin mootada.

xQofku xaq uma yeelan doono in ka badan laba TIPs muddo 10 sano ah.

MCL 257.306(5)

Mooto ayididda

Qofku, ka hor inta aanu wadin mootada, waxa aan ka ahayn mootho-shirreyya, waddo dadweyne ama waddo weyn, waa in uu ku soo iibsadaa ayididda mootho shatigiisa/geeda wadaha ama shafeetiga.

MCL 257.312a(1)

Qofka jabiya farqada (1) waxa uu ku galay faldambiyeed oo ciqaabta tahay sida soo socota:

- Xadgudubka koowaad, xadhig aan ka badnayn 90 maalmood ama ganaax aan ka badnayn \$500, ama labadaba.
- Xadgudubka dhaca ka dib xukun hore, ee xadhig aan ka badnayn 1 sano ama ganaax aan ka badnayn \$1,000, ama labadaba.

MCL 257.312a

Mootada sadddexda lug leh

Ayididda loo bixiyaa si loo wado mootada 3 lugood leh, oo aan ahayn mootho-shirreyy, waxay ku xaddidan tahay hawlgalkas mana sharciyaynaysa wadidda mootada 2 lug leh.

MCL 257.312b(3)

Maandooriyaha iyo Khamriga

Wadista mootada adigoo sakhraasan

Waa sharci darro in mooto lagu dhex wado Michigan:

- Adigoo sakhraansan ama la dacifsan khamri, deroogo sharci darro ah iyo dawooyin cayiman oo la qoray.
Mar walbo filo dhibaatoyinka macquulka, sameysana qorshe aad hoos uugu dhigi karto ama aad ku cirib tiri karto. Ka fikir waqtigaaga iyo firaaqada u baahan tahay si aad u bad qabto. Waa in aad naftaada siisa waqtii aad ku qiimeyso xaaladaha halista haddii ay dhacdo.

Fulin

Samey waxa aad go'aansato. Maxaa sameyne oo sidee u sameyne?

Si aad u banleysato boos ama fursad hoosna ugu dhigto haddee halis jirto:

- Isku toosi booskaaga iyo/ ama jihadaada.
- Xawaaraahaaga hagaaji adigoo kordhinaya, gaabinaya ama joojinaya.
- Joogitaankaaga iyo waxaa damacsan tahay ku muuji leerarka iyo hoonka.



Isticmaal istaraatijiyada xirfada SEE si aad naftaada u siiso waqtii iyo firaalo. Meelkasto ayee ku shaqeysa waxa ayna kugu caawin kartaa badbaadadaada nafsi iyo tan dadka kale.

Isgoysyada

Meesha ugu badan ee macquulka tahay in shil kula gasho gawaarida kale ayaa ah isgoysyada. Gawaarida kaa horeysa ee u leexanaya dhanka bidix ayaa ah mid kamida halista ugu weyn. Sida aad u isticmaasho SEE marka aad isgoysyada joogto ayaa muhiim ah.

Badi fursada ah in lagu arko marka aad isgoysyada joogto. Kusoco seed ay kaa arki karaan gawaarida soo socota oo daaro leerka afka hore. Ubaney mootada boos fiican oo kuu ogolaanayo in aad ku baxsato hadday wax dhacaan.

Marka aad isgoys usoo dhawaaneyso lagana yaabo in uu baabuur usoo gudbo wadadaada:

- Xawaaraahaaga dhin.
- Dooro seed darawalka kale uu kaa arki karo si fiican.
- Qabo labada bareeg si aad usoo yareyso waqtiga aad u baahan tahay in aad ku falceliso.
- Qabo firisyonaha si aadan u joogsan matoorkana u caburmin. Marka aad soo gasho isgoyska, ka fogaaaw gawaarida.

- Dhaq dhaqaad deg dega oon aadan ka fiirsan hasameyn, waxaa laga yaaba darawalada in ay kuu arkaan in aad leexaneyso.
- U diyaar garow in aad talaabo qaado.

Isgoysyada

Boqolkiiba afartan shilalka u dhaxeya mootada- iyo-gawaarida waxaa keena darawalada kale ee isgoysyada marayo.



Sawirka baaburta waxa laga so xigtag Maxim Popov ©123RF.com

Layrarka taraafikada wadooyinka ee dareema gawaarida

Leerarka darema gawaarida ayaa caqabad ku noqon kara mootoyinka maadama laga yaabo in aysan dareemin joogitaanka mootada. Si aad u hubsato in lagu arko istaag halka ay leerarka taraafikada ku yaalan. Inta badan waxaa laga arki karaa wadada.

Layrarka taraafikada wadooyinka ee dareema gawaarida



Maareynta boosaska banaan

Waxaa aad muhiim u ah in marwalbo adiga iyo gawaarida kale ay "firaalo aad ku baxsato" idiiin dhaxeyo.

In aad kordhiso firaaqada ama masaafada idiiin dhaxeyso adiga iyo gawaarida kale waxa ay kaa caawineysa in aad hesho:

- Waqtii aad ku falceliso.
- Nafis aad ku dhaq-dhaqaaqdo.

Darawalka masuulka ah waxa uu ogyahay in firaaqdu ay tahay difaaca ugu wanaagsan ee halista imaan karta.

Bosaska Seedka

Si marka loo fiiryo cabirka mootada ayaa faa'iido kuu noqon karta. Seed walbo oo lamiga waxa uu mootada fursad u siinaya sadax wado oo ay ku socon karto, sida ka muuqato sawirada tilmaanta.



Booskaaga seedka waa:

- Inuu sare u qaada fursadaha ah in lagu arko.
- Inuu ka fogada meelaha aan lagaa arkeynин.
- Ka fogoow meelaha wadadu halista ka tahay.
- Ka difaaco seedkaaga darawaliinta kale.
- Usheeg waxaad damacsan tahay gawaarida kale.
- Ka fogoow dabeesha ka imaaneysa gawaarida kale.
- Diyaarso wado aad ku baxsato.

Guud ahaan, ma jiro boos kaliya oo ku wanaagsan in lagu arko firaqona aad uuga bad baado gawaarida kale aad ka heli karto. Haka fogaan dhinac kamida seedka - xitaa oo ay ku jирто dhex bartanka haddii cimilada iyo xaalada wadada ay saamaxeyso.

Kusoco seedka meel sida ugu fiican lagaaga arki karo oo aad fursad wanaagsan ood ku baxdo ku heleyso haddii ay wax dhacaan. Seedadka isku kala goosh si aad uuga fogaato gawaarida kale. Darawalka masuulka ah waxa uu isku bad badalaa seedadka hadba sidee xaalada isku badasho. Kusoco seedka 2-aad ama 3-aad haddii gawaari ama khatar ay kaa jирто dhanka bidix. Haka dhex bixin seedka 1 ama 2 haddii khatarta ay kaa jирто dhanka midig. Haddii labada dhinac ay gawaari kaa jирто, dhex bartamaha seedka, seedka 2aad, aaya inta badan ah fursada ugu fiican.

Isticmaal seedka dhan si baaburleyda kale ay si fiican kuugu arkaan.

seedka dhexda ah aaya ku filan si nabad gelyo ah in aad ku socoto. Waxaad ku socon kartaa dhanka bidix ama midig ee seedka oolyada leh walina adigoo ku socdo bartamaha wadada. Ka fogoow in aad ku socoto meelaha ay oolyada iyo garaasada ku badan yihin sida isgoysyada mashquulka badan iyo koontorolada lacagaha lagu qaado.

Qeybta oolyada leh ee gawaarida ay uuga daadato inta badan kama weyna labo fiit. Haddii aysan wadada qeyneen,

Dabasocodka gaari kale

Mootoleyda waxa ay u baahan yihin mid lamida fogaanta ay u baahan yihin in gawaaridu ku joogsato. Waxaa darawalada cusub ee mootoyinka lagula taliyah in ay joogteyan **fogaan dhan afar sakin** ee gaariga kaa horeyo. Tani waxa ay ku siineysa firaqo aad ku joogsato, kaga wareegato ama firaqo macquul ah ood ku bad baado.

Waxaad u baahan tahay firaqo badan haddii ay motadaada ay u baahan tahay foogaan dheer ay ku joogsato. Tusaale, haddii ku socoto xawaare dhan 40 mph ama ka badan, wadaduna ay sabiibax tahay, haddii aadan arki karin gaariga kaa horeeya ama haddii wadadu jaam tahay ama laga yaabo in uu qof isku soo ciriiriyo, sii fursad shan sakin ah ama wax kabaden.

Si fiican uuga danbey gaariga kaa horeyo marka leydiin joojiyo. Tani waxa ay kuu fududeynesa in aad ka leexato wadada hadii qofka kaa danbeyo uuso joogsaneynin ama xawaaraha dhimeynin. Sidoo kale waxa ay ku siineysa fursad haddii gaariga kaa horeyo uu isku dayo in uu gadaal usoo noqdo arimo jiro awgeed.

Si aad u qayaasto fogtaan aad daba socoto:

- Qabso shey, tusaale sida darjiin, calaamad, tabeele, ama wax kale oo jidka kaa horeya u dhaw ama ku yaalo.
- Marka qeybta danbe ee gaariga ay sheygan dhaafsto, waxaad tirisaa shan sakin: "kun-iyο-kow, kun-iyο-labo, kun-iyο-sadax, kun-iyο-afar."
- Haddii aad gaarto sheygan kahor inta aadan shan "afar" gaarin, aad ayaad ugu dhawdahay.
- Xawaarahaaga dhin kadibna mar kale tiri haddane adigoo qabsanaya shey kale si aad u fiiryo fogaanta cusub ee idin dhaxeyso. Kuceli ilaa aad ka gaarto meel aadan tirineynin ka yar "afar sakin."

Haddii lagu daba socdo



Marka aad xawaareyso adigoo qof aad kuu daba jooga ka fogaanaya, inta badan waxaa dhacda in uu qofku xawaare sare kugu daba galoo.

Sida ugu wanaagsan ee gawaarida ku daba raacdeneysa la yeelo aaya ah in ayaga leyska hormariyo. Marka uu qof hoosta kaaso galoo, seedka badalo una ogolow in ay ku dhaafsto. Haddii aadan sidaan sameyn karin, xawaaraha dhin fursadna sii gawaarida kaa horeyo si qofka kudaba jooga iyo adiguba aad u heshaan fursad aad ku joogsataan. Tani sidoo kale waxa ay ku dhiiro gelineysa in ay ku dhafaan. Haddii aysan ku gudbin, waxaad adiga iyo

qofka kudaba jooga siisay waqtii badan iyo fursad aad kaga falcelisaan haddii hortiina lama filaan ka dhaco.

Seed wadaagid

Gaawarida iyo mootoyinkuba waxa ay u baahan yihiin seed buuxo si ay nabad ugu socdalaan. Hala wadaagin seedka gawaarida kale. Leen wadaagidu waxa ay kuu keeni kartaa khatar iyo halis lama filaan ah ayadoo fursadaada yareyneso. Marka aad mootoyin kale daba socoto waa in aad usocotaan qaabka masko kale (qof hore midig, qofka danbe bidix camal) adigoo ku aadinaya mootada dhex bartamaha seedka haddii cimilada iyo wadaduba ku ogolanayaan, si aad uga hortagto in gawaarida kale in ay isku soo cirriiyaan seedkaaga. Haku dhex socon bartamaha gawaari taagan ama kuwa socdo. Tani waxa ay noqon kartaa halis.




Gawaarida kudhinac socota

Ka fogow in aad ku socoto meelaha aan leyska arkeynin. Darawalka masuulka ah waxa uu ka warqabaa gaariga la siman in uu si lama filaan ah jihadiisa u badali karo kuna qasbi karo xalaad halisteeda leh.

Gawaarida kale ee seedka kugu xiga ayaa wadadaad ku baxsan laheyd xiri kara haddii ay khatar kusoo wajahdo. Xawaarahaaga maarey ilaa aad ka heleyso firaajo kugu filan ee adiga iyo dhamaan gawaarida kale.

Meelaha aan leyska arkeynin



Wadooyinka aad ku baxsaneyso

Wado baxsad ayaa ah wado aad ku fakan karto haddii ay halis kugusoo wajahdo wadadaada. Wax micna malahan xaalada jirto, mar walbo isticmaal qaabka SEE si aad u qorsheyo wadada aad ku baxsan karto. Sawirka soo socda ayaa muujinaya Talooyin Fudud, bokiska koowaad ayaa ku tisinaya darawal mooto heysta sadax wado uu ku baxsan karo, haddii uu u baahdo in uu wado kale qaado. Bokiska labaad waxa uu ku tisinaya qofka aanan qorsheysan wado uu ku baxsasdo. Darawalka mootada kuma socdo wado uu mid kale kaga dhici karo, taaso oo ku keeni karta khatar.

Gawaarida wadada soo galaya

Ha umaleynin in darawalada kale ee soo galaya wadada halka laga soo galo in ay ku arkayaan. Yarey halista ka imaan kartaa adigoo siinaya fursad boos weyn oo idii dhaxeyo. Seedadka isku badal hadii uu mid furan yahay. Haddii aadan heysan farsad aad seedka ku badalato, xawaarahaaga dhin ama kor dhi si aad boos ugu furto darawalka wadada soo galaya.

TALOOYIN FUDUD



KASOO QAAD IN AAN LAGU ARKEYNIN-HI

Haddii aad wado mooto, waxaad ogtahay in aad tahay sidii murayad leyska dhex arkaayo kale, sababtoo ah darawalada gawaarida ayaa badanaa fiiriyo waxa kaa danbeyo. Waxaa laga yaaba in ay arkayaan gaariga kaa danbeyo, laakiin kuuma jeedaan adiga, kaso horeya "dhuubnaantada awgeed," maskaxdooda qeybta wax aragta in aysan ku diwaan galin ayaa laga yaabaa xitaa hadduu yahay darawalada ugu feejigan.

Taasi waa sababta gawaarida kugu soo socda ay bidix ugu leexan horaada ugu leexan karaan isgoyska.



Sidoo kale tana waa sababta gaariga ku dhinac socda, xitaa haddii ay leexdaan dhinacaagana soo firiyaañ kahor inta aysan seedka isku badalin, ayaa laga yaaba in ay seedkaaga soo galaan.



Waxaa muruga ah, in darawaladu ay sidaan u dhaqmaan xitaa haddii aysan ku mashquulsaneyn taleefan, GPS-ka, radiyaha setarleedka, ama wax yaabaha kale ee madaalada gaariga. Marka sidee uuga kabsan kartaa "in aysan ku arkeyn" darawalada kale?

Digtoonow ilaa intii macqul ah. Xiro dhar iftiimaya iyo koofida madaxa oo kalar-iftiimaya leh. Marwalbo leerarka hore hakuu shidnaadaan, isticmaalna leerarka iftiinka badan ama leer badalayasha suuqa maalintii (meelaha la ogol yahay).

Samey koorsa darawalnimada mootada la aqoonsan yahay. Baro sida looga dhex bixiyo mootada meelaha caadiga iyo halista, ku celceli barashada bareega iyo leex leexashada degdega inta badan. Sidoo kale fahan nabad kusocoshadu waxa ay ku xiran tahay si lamida xirfadaha maskaxda iyo feejignaanta iyo go'aan qaadashada sida ay leex leexinta birta ay ugu baahan tahay awooda jirka; si dhaqsiya uuga falceli khataraka macqulka inta ka fal celin laheyd durbadii khatar dhacday.

Iska dhig in aanan lagu arkeyn. Haddi aad kasoo qaado in dadka kale ee kula maraya wadada aysan ku arkeyn, iyo in gaari kasta macqul tahay in uu kugu dhaco adiga uu kugu dhici doono, waxaad ku socon doonta maskax feejigan waxaadha baran doonta sida ku ogaan laheyd wax kasta ee kugu hareereysan. Si kale haddii loo dhigo, waxaad qaadi doonta masuuliyad dheeriya ee badbaadadaada adigoo si feejigan u socon doono. Waa bad badali doonta xawaarahaga iyo booska aad seedka ka heysato si aad halka ugu fiican iskugu aadiso ugana cararto isku dhac, u qorsheyso wadooyin baxsad hadii darawal kale kusoo xad gudbo seedkaaga, qabo bareegaaga si aad falcelintaada u dadajiso, isticmaal hoonkaaga si aad ugu digto darwalka aan kaa warqabin adiga, marwalbana kusoco adiga xadkaaga.

**GAARILEYDA AYAA ARKA KALIYA WAXA AY FILAYAAN, INTA BADANA KUMA FILAYAAN ADIGA IN AAD KU DHEX JIRTO GAWAARIDA SOCOTA. KUSOCO SIDA SAXDAA XIRFAD, QORSHE, DABEECAD AHAAN INTABA.
HALAGU ARKO - NABAD QAB.**



Sawirka baaburta waxa laga so xigtay Maxim Popov©123RF.com



In lagu arko waa masuuliyadaada!

Midabada dhalaala iyo agabka aadka u muuqda ayaa ah waxa ugu wanaagsan ee kaa caawin kara in gaawarida kale ku aragto habeen iyo maalinba.

Dharka

Shilalka inta badan waxe dhacaan maalinta cad. Xiro dhar midabkiisu dhalaalayo ama bir birqaayo si markaa si fiican laguugu arko. Xasuusnow, jirkaagu in uu yahay bar kamida muuqa mootad oo dhan iyo darawalka wado.

Dhaldhalaal, midab ifaaya dhar leh ayaa ugu wanaagsan. Midab ifaayo sida oranjo, gaduud, jaalle, ama jaakad cagaar ah ama garamada shaqo ayaa waxa ugu wanaagsan ee laguugu arki karo. Koofi midab ifaayo leh ayaa sidoo kale kaa caawin karto in lagu arko. Dharka dhal-dhalalka leh sida garamada shaqada iyo dhinacyada koofida mootoda ayaa darawalada dhinacaga kaso socda ka caawin doono in ay ku arkaan. Dharka dhal-dhalalo ayaa aad u caawin karo darawalada kugu soo socdo ama gadaal kasoo socdo.



Kordhinta Muuqa aragtii

Shilalka dhaca ee mootoyinka, darwalada ayaa inta badan dhaha maba arag mootolaha. Horay iyo gadaalba, mootoda ayaa inbadan aad uuga yar gawaarida. Sidoo kale, waa ay adag tahay in aad aragto wax aadan filaneyn, inta badana darawaliinta ma filanayaan mootoyin. Waxee u badan tahay, in ay dhuubnida ka dhex arkaan, wax labo lugood leh uguna muuqdo gaari ayaga dhib ku keeni kara.

Xitaa hadii uu darawalku ku arkaayo in aad soo socoto, taa micnaheda maahan in aad si lahubo u amaan qabto. Mootoyinka ayaa meel fog uuga muuqdo, waxa ayna la tahay si ka duwan xaqiqiad oo ah in ay xawaare hoose ku socoto. Waa wax inta badan dhaca in darawaladu ay mootoyinka ku horjaraan, ayagoo mooda in ay waqtii badan oo ku filan heysto. Inta badan, waa ay qaldan yihiin. Hase ahaate, waxaad sameyn kartaa waxyabo badan si aad ugu fududeysio in dadka kale ay ku fahmaan adiga iyo mootadaadaba.



Laambadda madaxa

Sida ugu wanaagsan ee mootadaada lagu arki karo ayaa ah in leerka hore kuu daaran yahay - mar walbo (mootoyinka cusub ee lagu gado USA laga soo bilaabo 1978 ilaa hadda ayaa leh leerka hore oo si otomatik ah shidmayo marka ay socoto). Daraasado ayaa shegaya, in maalintii, mootolaha leerka u shidan yahay ay macquul tahay in labo jibaar la arko.

Calaamadeyn

Calaamad muuiyaha mootoda ayaa lamida kuwa gawaarida. Waxey dadka kale u shegayaan waxa aad rabto in aad sameyso. Iisticmaal mar walbo ood rabto in aad seedka badalato. Iisticmaal xitaa marka aad u

maleyso in cid kale aysan kuu dhaweyn. Nuglaanta dheeriga ee mootolaha awgii, calaamadaha ayaa aad muhiim u ah. Wuxa ay fududeeyaan in lagu arko.

Marka aad soo gasho laami weynaha, darawalada kaaga soo dhawaanaya gadaal ayee u badan tahay in ay arkaan calamadaada oo dhag dhag leh waxa ayna kuu baneynayaan boos.

Marka aad leexato, waa in aad damisaa caalamada ama darawal ayaa laga yaaba in uu kugu so leexdo asagoo mooda in aad mar kale leexaneyso.

Layrka bareega

Layrka bareega ee mootadaada sida kan gawaarida oo kale looma arko - qasatan marka uu layrka danbe shidan yahay. (leerka danbe waxuu la shidma leerka hore.) Haddii ay xaaladu kuu saamaxdo, ku caawi darawalada kale in aad falaashto leerka bareega danbe inta aadan xawaaraha dhimin. Waxaa ay aad muhiim u tahay in aad falaashto leerka bareegga danbe kahor:

- Inta aadan dhaqso xawaaraha dhimin si kaduwan waxa lagaa filaayo, tusaale dhimida xawaaraha sare ee laamiga weyn.
- Inta aadan xawaaraha dhimin meelaha aan laga filaneyn tusaale, jid cade ama luuq dhexdiisa

Haddii si dhaw laguu daba socdo, waxaa fiican in aad falaashto layrka bareegga danbe kahor inta aadan xawaaraha dhimin. Qofka ku daba joogo ayaa laga yaaba in uu ku daawanayo uusana arkeyn waxa kaa horeeyo ee aad xawaaraha u dhimeyso. Tan ayaa suurto gal in ay ka niyad jabiso in uu hoosta kaaso galoo ayadoo kaga digeyso halista hore ee uusan arkeyn.

Hoon-yeerin


Diyar u ahaaw in aad hoonkaaga isticmaasho si aad niyada shaqsi uso jeediso. Wuxaad niyada ku heysa in hoonka mootada uusan u weyneen sida kan gaariga. Sidaa darteed, isticmaal, laakiin ha isku haleynin. Qorshayaal kale ayaa wanaagsan in lagu daro hoonka.

Maareynta xawaaraha

Isticmaalida dhulka halista

- Dhulka sabiibaxa.
- Wadooyinka tareenka.
- Wadooyinka jeex jeexan iyo kuwa shabaqa.
- Caleemaha.
- Lamiyada dil-dilaacsan.

Wadooyinka Qoyan



Wadooyinka sabiibaxa

Wadooyinka sabiibaxa, waa in aad feejignaata.

Mootoyinka waxa ay fiican yihiin marka lagu wado wadooyinka laamiga jayga. In aad misaanka ilaalso iyo in aad mootada maareyso waa dhib marka aad ku socoto wadooyinka sabiibaxa.

Si aad halistan iskaga ilaalso waxaad sameyn kartaa talaaboyin ka hortaga:

- **Xawaaro dhimid** – Xawaaraha dhin kahor inta aadan gaarin wado sabiibaxa si aad hoos ugu dhigto halista ah in ay kula sibiido oo aad fogaanta daba socosho dheereyso. Mootadaadu waxa ay u baahan tahay masaafu dheer si ay u joogsato. Sido kale, waxaa aad muhiim u ah in aad dhinto xawaaraha inta aadan gelin wado qoyan.
- **Hasameyn dhaq-dhaqaad degdega** – Isbadal deg dega ee xawaaraha iyo jihada ayaa keeni kara in aad sibiido. Deganaaw ilaa intii macquula marka aad xawaaraha kordhiso, geerka badasho, leexaneyso ama aad bareeg qabaneyso.
- **Isticmaal labada bareeg** – Bareega hore ayaa wali ugu muhiimsan, xitaa wadooyinka sabiibaxa. Si tartiiba usoo qabo bareega ilaa ugu danbeyn si markaa lugta hore aysan iskaga kaa xirin. Xasusnow, cadaadis yar in aad saarto bareega danbe.

Wadooyinka aan xajiska fiican laheyn waxa kamida:

- **Dhulalka qoyan**– Qaasan marka uu roob da'o kadib iyo inta aysan oolyada wadada dhinaceda u gorarin. Marka uu roobku bilaawdo, waxaad ku socotaa dhinaca bidix ee seedka gawaarida kana fogoow meelaha biyaha fadhiyo iyo birarka laamiga. Inta badan, seedka lugta bidix ayaa ah booska ugu fiican, ayadoo ay ku xiran tahay gawaarida iyo xaalada wadada sidoo kale.

- Wadooyinka barafka ama dhadada leh – Dhadada barafka ayaa meelaha qaar durbadiiba ku dhalaasho. Baraf ayaa ku sameysmi karo meelaha hoose ama hooska leh iyo buundoyinka iyo meelaha kore ee la maro. Waxaa lagula talinaya in aad ka fogaato wadooyinka barafka iyo dhadada barafka leh.
- Wadooyinka dhalaalo – Biraha saaran, saxamaanka qalinka, buundoyinka shabaqa leh, wadada tareenka, calamadaha seedka, caleemaha iyo alwaaxda ayaa aad halis u noqon kara marka ay qoyan yihiiin.
- Wadooyinka dhiiqada iyo jaayga – Jidatka ka baxaa laamiga weyn ama soo gala, dhiiqada ama jaayga ayaa ka buuxsami kara dhinacyada laamiga. Xulo seed hoos u dhimaya halista dhaawac ee kugu imaan karta.
- Meelaha oolyada ku daadatay – Iska fiiri meelahan marka aad istaagto ama aad joogsataba. Waxaa laga yaaba in aad sibiqdo oo aad dhacdo. In aad si fiican lugaha ugu celiso oo aad isku dheeli tirtu mootada waa muhiim marka aad joogsato.

Wadooyinka tareenka, taremada yar-yar, iyo shabaqa marsho biyeeriga

Inta badan waxaa wanaagsan in aad si toos ah ugu socoto seedkaaga marka aad ka gudbeyso wadoyinkan. Ku leexasho xagal 90 digrii ah ama wado lasiman ayaa aad halis u noqon karta - wadadaada ayaa laga yaabaa in ay seedkale ee baaburta kugu rido.




Wadada tareenka iyo wadada is garab socda wadada aad ku socoto, wax badan ka fogoow wadoyinkan, wadooyinka dhiiqada, ama shabaqa marsho biyeeriga in aad ugu leexato xagal dhan 45 digrii. Kadib, si dhaqsiya, goolad aad u qaloocan. Gees shishe in aad ku socoto ayaa keeni karta in lugta mootada kuu baxdo sidaana uu kontorolka kaaga dhumo.

Walxaha-jidgooyada ah

Xirfad indho indheyn fiican ayaa kugu caawin karto in aad ka fogaato godadka laamiga, askari jiifa, iyo walxaha jidka yaal. Haddii waxa aan laga fogaan karin xaawaraha isku badal fadhigana ka kac adigoo isticmaalaya lugahaaga si mootadu jugta u xamisho.

Wadooyinka shabaqa iyo jarjarka xariimaha leh

Ku dul socoshada shaqaba roobka ama buundo ayaa keeni karta in mootadu ay liicdo. Kusoco xawaare joogta ah iyo wado toosan. Adigo jaleeca in aad gudubto waxa ay keeni kartaa in aad ku leex leexato seedkaaga.



Tijaabi aqoontaada

1. Meesha ugu badan ee adiga iyo gawaarida kale aad iskugu dhici kartaan waa:

- A. Laami weynaha.
- B. Isgoysyada.
- C. Marka aad tiihin koox mooto ley ah.

2. Inta badan sida ugu wanaagsan ee lagu wajaho darwalada hoosta kaa soo galaya waa in:

- A. Aad badalato seedka si aad ugu ogolaato in uu ku dhaafu ama in aad xawaarahaa dhinto si aad boos badan u baneysato.
- B. Xawaarayso si aad u kordhiso foganta idiin dhaxeyso adiga iyo qofka ku daba joogo.
- C. Iska dhaga tirto.

3. Marka uu roob da'ayo waxaa wanaagsan:

- A. In aad uga socoto seedka dhaxda.
- B. In aad ku socoto dhanka midig ee seedka.
- C. In aad ku socoto raadka baaburka kaa horeyo ka tagay.

4. Qaabka ugu wanaagsan ee aad ku caawin karto darawalada kale waa in ay mootadaada arkaan waa:

- A. In uu leerka marwalbo kuu daarnaado.
- B. Indhaha aad indhaha u saarto.
- C. Hoonka aad ku daarto.

- 1. *B – bogga 38, Isgoysyada*
- 2. *A – bogga 39-40, Haddii lagu daba socdo*
- 3. *C – bogga 43, Wadooyinka sabiibaxa*
- 4. *A – bogga 42, Kordhinta lami qabisga*

Maareynta wadada

Wadada xaaladaha ayaa si joogta isku badala. Ka darawal masuul ahaan, waxaad ogtahay sida ay muhiim u tahay



in aad gacanta ku
heyo kontoroolka
mootada. Darawalka
masuulka ah waxa uu
og yahay in maareynta
wanaagsan ee wadada
ay ka bilaabato aqoon
iyo ku dhaqmida SEE
- Raadin, Qiimeyn, iyo
Ku-dhaqan.

SM – SEE waa calaamada MSF. Fasax lagu isticmaalayo.

Ka fogaanshaha shil

Wax micno ah malahan sida aad u taxadarto, waxaa jiri doono marar aad gali doonto xaalad adag. Fursadaha aad uuga fogaan karto shil iyo suurta galka dhaawac ku soo gaara ayaa ku xiran sida ugu dhaqsiyaha badan kuna haboon ee aad ku fal celiso. Labo xirfad oo aad muhiim ugu ah ka fogaanta shilalka una baahan tahay in aad barato kuna dhaqanto ayaa ah deg-degsimo iyo jiho badalid deg-dega.

Dhaqsi joogsasho

In aad mootada dhaqsi joojiso waliba si amaana ayaa ah xirfad u baahan isku day badan.

Waxaa lagu gaari karaa in aad si taxadar leh u caburiso bareega hore iyo kan danbe ayadoo isla markaas aysan is xireynin.

Si aad tan u sameyso:

- Si tertiiba u qabo gacanka bareega adigoo isla markaasba cadaadinaya bareega danbe. Xoog ha u qabanin bareega hore iyo kan danbe islamarkiiba. Si tertiiba caburinta ugu kordhi bareegga hore si culeyska uu u fuulo luugta hore.
- Jilbahaaga taangiga shidaalka usoo dhawey, indhahana kor u qaad adigoo hortaada si fiican iskaga fiirinaayo. Fadhi qaabeed wanaagsan oo aad ku wado mootada ayaa kaa caawin doono in aad leen toosan ku joogsato.
- Haddii ay lugta hore is xirto, cadaadiska ka yarey bareega hore si ay u wareegsato, kadibna isla

Qaybtaan waxay ka hadleeysa

- Ka fogaanshaha shil
- Gooladaha

markaasba dib u qabo adigoo si xadidan u cadaadinaya.

- Haddii lugta danbe ay is xirto, sidaa ku daa ha xirnaato ilaa ay gabii ahaanba ka wada joogsato. Cadaadis ku haay lugta danbe adigoo jilbahaaga ku dhajinaya taangiga shidaalka madaxa iyo indhahana sare u qaadaya. Mootada ayaad leen toosan ku joojin kartaa xitaa haddii lugta danbe ay isxirto.

Ku joojinta deg-dega ee goolad

Haddii ay qasab kugu tahay in aad si dhaqsiya u joogsato adigo leexanaya ama goolad galaya, sida ugu wanaagsan ayaa in aad toosiso mootada, gacmaha isteerinka sinto kadibna joogsato. Waxaa jiri karo xaalado aan kuu ogolaaneyn in aad is toosiso marka hore, sida in aad ka baxdo wadada dhanka bidix ee goolada ama in ay kugu soo socdaan gawaari dhanka midig ee goolada. Markee sidaano kale ku qabsato, si tertiiba uwada qabo adigoo cadaadinaya bareegyada. Inta aad xawaaraha dhimeyso, waxaad toosin karta inyar xagashaada qaloocan adigoo sii cadaadinaya bareega ilaa ay mootada ka toosto bareega aad heyo ilaa halka ugu danbeyso ee macquulka. Waa inaad “toosisaa” gacan-qabadyada ee dhawrka fit ee u dambeeya ee joogsiga; mootada waa in ay toos noqotaa.

Qalabka kahor-taga bareega isxiraya (ABS)

Mootoyinka qaar ayaa isticmaalo aaladan si ay uuga hortagaan in bareega iska xiro. Haddii mootadaadu leedahay qalabka bareeg xiraha ka hortaga, waxaad si fiican u qabataa labada bareeg kan hore iyo kan danbe sida ugu dhaqsiyaha badan uguna xooga badan ee aad karto. Waxaa laga yaaba in aad gariig neefsasho ka darento bareegyada; kusii dhagnaaw oo haka deyn cadaadinta ilaa mootada ay gabii ahaanba joogsato.

Maareynta meelaha sibiqa

Mar marka qaar lagama fogaan karo in aad simbirixatid. Sidan ayaa la sameeyaa:


- Lugta hore haddee sibiriiraxato – Haddii lugta hore is xирто, ka fuq bareega hore gabи ahaan sida ugu dhaqsiyaha badan. Mar kale si dagan dib ugu qabo. Lugta hore taraaraxeeda waxuu keenaa in uu kaa dhumo kontoroolka isteerinka iyo xakameynta mootada. Haddii aad sii deyn weyso bareega islamarkiiba waxaad galeysaa shil.
- Sabiibaxashada lugta danbe – Lugta danbe haddee sambiriiraxato waa xaalad halisa, waxaana keeni kara cadaadis xoogan oo aad saartay bareega danbe, waxa ayna keeni kartaa shil aad u daran iyo dhaawac halisa ama dhimasho. Haddii lugta danbe ay taraaraxeyso, haay bareega danbe adigoo lugta hore toosinaya, ilaa aad gabи ahaanba ka joogsato. Haka fuqin bareega danbe.

Seed badalasho deg-deg ah

SWaa wax wanaagsan in aad si deg-deg ah u seed badalato si aad shil uuga fogato haddii istaagid uusan xal ku jirin. Deg-deg u seed badalashadu waa jiho badalasho deg-deg ah. Iska hubi in aad heysato firaquo iyo waqt kugu filan oo aad ku seed badalato. Waxa ay noqon kartaa labpo leex leexasho oo deg-dega ama si dhaqsiya in aad dhinac ugu leexato. Si aad deg-deg ugu seed badalato:

- Si fiican u qabo gacanta dhinaca aad u leexan rabto. Tani waxa ay keeneysa in mootada dhinacaas u jaleecato isla markiiba. Leexashada cabirkeedu waxuu ku xiran yahay sida ay mootadu u jaleecato.
- Gacanta kale riix marka aad ka leexato jidgoyada si aad booskaagi hore aad ku socotay dib ugu noqoto.
- Jirkaagu ha toosnaado una ogoloow in mootadu ay u jaleecdo dhinaca aad u leexaneysu adigoo jilbahaaga ku dhejinaya taangiga shidaalka lugahaagana aad ku heysu fadhiga lugaha.


Haddii bareeg qabasho loo bahaan yahay, ha sameynin inta seed badalaneyso. Bareega qabo kahor ama kadib - laakiin maya waligaa inta aad seed badalaneyso.



Sawirka baaburta waxa laga so xigtay Maxim Popov ©123RF.com

Goolad gelida


Darawalo badan oo shil galay ayaa gooladaha xoog ku gala ayaga oo aan awoodin in ay goolada ka dhextaa. Inkastoo gooladaha ay kala duwan yihiin, hababka goolad gelida ee asaasiga waa - xawaare dhimis, indho-indheyn, riixid, qabasho bareegyada - dhamaan ayaad iskugu dareysa gooladaha.



Seedkaaga ugu fiican waxa ay ku xiran tahay gawaarida, wadada xaaladeda iyo goolada wadada.

Haddii ay gawaari joogto:

- Waxaad u tagtaa dhextaa bartamaha seedkaaga inta aadan goolada gelin - hana kaleexan ilaa aad ka baxdo goolada. Tan ayaa kaa caawin doonto in aad aragto gawaarida adigo qiimeynaya "cariiriga" ka jira dhextaa bartamaha ama walxaha xiraaya seedkaaga.



Haddii aysan gawaari ku jirin:

- Wuxaad kasoo bilaawda banaanka goolada si aad u balaariso inta aad wadada arki karto.
- Marka aad leexaneyso, usoo bado dhex bartamaha wadada goolada, marka aad kala barka dhaaftana, waxaad u badataa geeska shishe si aad uuga dhex baxdo. Tan ayaa sameysa leen toosan ee goolada.



Tijaabi aqoontaada

1. Sida ugu wanaagsan ee aad dhakhso ugu joogsan karto ayaa ah:

- Inaad qabato bareega hore oo kaliya.
- Inaad isticmaasho bareega danbe marka hore.
- Inaad isticmaasho labada bareeg islamar.

2. Halkee ku aadineysa mootadaada marka aad goolad galeysyo haddii ay baabur ku jirto?

- Goolada dibadeeda.
- Goolada gudaheeda.
- Dhex bartamaha wadada

1. C – bogga 46, Joogsi deg-dega

2. C – bogga 47-48, Goolad galid

Ka feejignoow in gooladu ay sideeda ahaan doonto, ama ay dib ka ballaaran doonto, ama soo yaraaneyso ama dhowr gooladood leedahay. Kusoco xadka xirfadaada iyo xawaaraha loo dajiyay. Dooro seed leen toosan oo aad ku socoto ilaa inta aad goolada ku jirto gawaarida kalena kuu saamaxeyso.

Xaaladaha Khaaska ee Mooto Wadida

Qeybtan soo socota ayaad ka heleya warbixin dheeriya oo ku saabsan xaaladaha khaaska ee aad la kulmi karto marka aad mootada wado.

Wadooyinka dhinaca u buuran


Wado dhexda u sareysa dhinacyadana u gaaban ayaa ah wado dhinac buuran (crowned). Feejignoo oo tartiib ku mar wadooyinka dhexda u buuran maxa yeelay dhinacyada ayaa hooseya xagasha aad ku leexaneyso ayaa mida wadada caadiga ka yar.

Wadooyinka dhinaca u buuran



Goobaha shaqada

Goobaha shaqada ka socoto ayaa halis kuwada ah dhamaan darawalada kala duwan, haba ugu sii darnaate mootaleyda. Maadaama mootodo afar lug oo ay isku celiso aysan laheyn, mootolaha waa in uu xawaaraha dhimo khaasatan asagoo ka warqabo halista imaan karta.



Nuucyadan soo socda ayaa ah howlaha qatarta wadada ku ah iyo haddii aad la kulanto waxa aad sameyneso:

- **Bacaadka iyo jayga** – Xawaaraha dhin, hasameyn leexasho deg-dega, wado toosan adigo ku socda bareeg qabo. Haddii aad lakulanto bacaad ama jaay dheer, geerka iska bixi xawaarahaagana dhin.

Qaybaan waxay ka hadleeysa

- Wadooyinka dhinaca u buuran
- Goobaha shaqada
- Lug halaawda
- Xoolaha
- Dabeysha

- **Wadooyinka sidi shabaqo kala** – Madaxa kor u qaad indhahana horaada ku haay. Tartiib u soco, hala xarbin gacan-qabadyada. Sheelare miinima ah qabso.
- **Oolyo ama laami fareesha** – Ka fogoow hadde macquul tahay. Tartiib u soco leexashooyinka deg-degana iska ilaali.
- **Wadooyinka dil-dilaacsan ama aan sineen** – Iska indho-indhey laamiga waxaadna ku socotaa meesha ugu siman. Kaga gudub si tertiiba oo taxadar leh. Ka warqab farqiga kala koreynta ee u dhaxeeya seedadka laamiga la saaray iyo kuwa aan wali la saarin - ku goynta wado sareyso xawaare sare iyo xagal yar waxa ay keeni kartaa in kontoroolka uu kaa dhumo.
- **Walxaha wadada yaal** – Si fiican horaada iskaga fiiri. Ka wareega walxaha haddii ay macquul tahay. Kordhi fogaanta aad ku daba joogto gaariga kaa horeyo haddii ay macquul tahay si aad fursad aad ku dhaq-dhaqaado u hesho.

Lug halaawda

Mar marka qaar waxaad arkeysaa lug banjartay. Haddii mootoda si kale ay noqoto, waxaa dhici karta in ay lug banjar tahay. Tani waxa ay noqon kartaa halis. Waa in aad ka ogaan karto sida ay mootoda u fal celineyso. Haddii mid kamida lugahaaga uu banjaro, ku dadaal in uusan kontoroolka kaa dhumin. Istaag oo fiiri lugta banjartay.

Haddii ay lugta hore banjartay, isteerinka ayaa noqon doono mid “culeys badan.” Lug hore oo banjar ah waa halis sababtoo ah waxa ay sameyn ku leedahay sida aad u leex leexaneyso. Waa inaad si wanaagsan uga adkaata isteerinka si aad u koontoroshoo.

Haddii lugta danbe ay banjarto, dhinaca danbe ee mootoda ayaa lulan karo ama u liic liican karo dhinac iyo dhinac.


Haddii midkood labada taayar uu banjaro adigoo socdo:

- Gacmaha isteerinka si fiican u qabo, sheelaraha ka fuq oo wado toosan ku soco.

- Haddii bareeg loo bahan yahay in aad qabato, hase ahaate, si tartiiba u qabo bareega lugta aan banjarin haddii aad hubto midka ay tahay.
- Marka ay mootadu xawaaraha gaabiso, dhinac uuga bax wadada, firisiyoona qabo oo joogso.

Xoolaha

Marmarka qaar eyda ayaa ceyrsata mootoyinka. Marka aad aragto ey kuu soo dhawaanaya, xawaarahaaga yarey oo marshooyinka iska soo bixi kadibna marka aad u soo dhawaato eyga ka xawaarey eyga inta uusan hoosta kaaso gelin. Iska fiiri meesha aad usocoto oo mootadaada koontorol. Halaadin eyga oo lugta haku tuurin sababtoo ah waxaa dhib kugu noqonaya in aad mootada kontorosho.



Sawirada waxaa leh Majivecka©123RF.com

Marka uu ey ku soo ceyrsado:

1. Xawaarahaaga dhin,
2. Marshooyinka dhin
3. Markaad udhaw dahay eyga ka xawaarey.

Mootoyinka iyo deerada

Shilalka gawaarida iyo deerada ayaa dhaca waqtii kasta sanadkii. Maadama mootoyinku ay aad halis ugu tahay shilalkan, wadaha waxaa lagugula talinayaa inuu sameeyo:

- Mar walbo ood socoto iska ilaali deerada. Shilalka deerada ayaa ka dhaca magaalada, daafaha magaalada iyo baadiyahaba.

- Xawaarahaaga dhin. Xawaare dhimida ayaa fursad kuu siineyso in aad hesho waqtii badan oo aad ku aragto kagana fal celiso xayawaanka.
- Qabo bareega si aad u kordhiso waqtiga aad ku fal celineyso.
- Iisticmaal layrka aadka u iftiima ee hore ama layrka kale markay macquul tahay.
- Haddii aad kuwada socotaan koox mootaley ah, waxaad isku kala faafisan sidii xarag mas socdo kale. Haddii mid idinka mida uu ku dhaco deero, tani waxa ay hoos u dhigeysa fursada ah in darawalada kale ay wax soo gaaraan.
- Xirnaaw qalabka badbaadada mar walbo.

Xayawaanada waaweyn sida deerada ama goodirka ayaa dhib kale keenaya. Xayawaanadan lama saadalin karo haddii aad midna ku dhacdo waxaa kaaso gaari karo mid lamida marka aad gaari isku dhacdaan. Wuxaan aad u isticmaasha dhaq-dhaqaaqa SEE si aad waqtii dheeriya iyo firaqo aad ku dhaq-dhaqaaqdo u hesho marka mareyso meelaha xayawaanada joogaan. Haddii aad mid kamida xayawaanadan aad kula kulanto wadada ama meel u dhaw, ficolka ugu wanaagsan aad sameyn karto ayaa ah in aad joogsato inta aadan gaarin kahor. Kadibna sug ilaa uu xayawaanku ka dhaqaaqo ama iska tago.

Dabeysha

Dabaysha xoogan ee joogtada ah ayaa saameyn karto adiga iyo mootadaadaba. Waxa ay kugu saameyn kartaa meel kasta, inbadana waxa ay kugu qabsan kartaa dhulka banaan iyo buuraha.

Qalqalka dabeysha waxa uu imaan karaa marka aad wadada la isticmaaleyo baaburta waaweyn sida kuwa xamuulka, basaska iyo waliba kuwa raaxada. Si aad uuga falceliso dabeyl xoog badan ama dabeysha meer meerta:

- Dabeysha horay iskugu tiiri adigoo cadaadis hore saaraya gacmaha isteerinka.
- Ka fogoow baaburta kale marka ay kuu soo dhawaadaan ama ku ag marayaan.
- Dheerey fogaanta idii dhaxeyso.
- Wuxaad raadisa meel amaana oo aad joogsato intee xaalada ka haageyso haddii dabeyluhuna khatar kugu keeni karaan.

Joogsiga laamiga dhinaciisa

Haddii boos baakina uu ka baanan yahay laamiga geeskiisa, waxaad xaga danbe ee mootada xejisaa geeska laamiga. (Ogow: magaalooinka qaar waxa ay leeyihii sharuuc mootaleyda looga baahan yahay in ay garba jooga u istagaan geeska laamiga.)




Sawirka baaburta waxa laga so xigtay Maxim Popov©123RF.com

Haddii lagu dhafayo ama aad dhaafeysid

Marka lagu dhaafayo iyo marka aad adiga wax dhaafeysyo waxba kama duwan gaariga caadiga. Hase ahaate, in lagu arki karo ayaa aad muhiim u ah. Ku dadaal in darawalada kale ay ku arkaan, iyo in aad iska fiiriso halista.

Dhaafidda

Kusoco dhinaca bidix ee seedka adigoo ku **daba galaya** masaafso aad ku nabad galeysyo gawaarida kale si aad u balaarisoo inta aad arki karto adigana laguu arki karo. Iska hubi gawaarida soo socota iyo jiheeyaashooda. Iisticmaal haadadkaaga madaxaagana leex lexi si aad iskaga fiiriso gawaarida kaa danbeysa.



Sawirka gaariga yar iyo xamuulka waxaa leh Maxim Popov©123RF.com

Markaa badqabto, u leexo seedka bidix kadibna xawaarey. Waxaad qabsataa seed aan ciriiri ku aheyn gaariga aad gudbeysyo kuna siinayo nifaas aad halista seedkaaga kaga fogaato.


Kusoco goobaha aan leyska arkeyn sida ugu dhaqsiyaha badan uguna amaansan oo macquulka.

Calaamadey mar kale, iskana firi haadadka kahor inta aadan ku laaban seedkaagi hore kadibna iska dami leerka bilig biligta.

Marka lagu dhaafayo

Marka lagu dhaafayo, waxaad ku socotaa dhex bartamaha seedkaaga. Marka aad u dhawaato gawaarida ku gudbeysa waxa ay ku gelin karaan halis Marka lagu dhaafayo. Ha u gudbin dhinaca ugu fog ee seedka gaariga ku dhaafaya. Waxaa laga yaaba in aad ku dhiiro geliso darawalka in uu seedkaaga soo galo.

Marka lagu dhaafayo



Car and truck images credited to Maxim Popov©123RF.com

Gacan ku calamadeyn

Sidoo kale waa in aad taqaano calamad bixinta gacanta, sida sawirka ka muuqato, waana inaad isticmaali karto haddii leerarka calaamad bixinta mootada aysan u shaqeeyenin sida saxda ah.



Tijaabi aqoontaada

1. Marka aad mareyo wadooyinka jeex jeexan ama shaqaba leh ee goobaha shaqada kasocoto:

- A.Hoos iska fiiri si aad u aragto isbadalka wadada.
- B.Indhahaaga iyo madaxaaga kor u qaad.
- C.Kusoco dhanka bidix ee seedka.

2. Haddii uu ey kusoo ceysado:

- A.Joogso ilaa xayawaanku uu xiisaha ka dago.
- B.Si tartiiba ugu soo dhawaaw xayawaanka kadibna ka xawaaree.
- C.Ka wareegso xayawaanka.

1. B – bogga 49, Goobaha shaqada

2. B – bogga 50, Xayawaanada

Rakaabka, Xamuulka iyo Koox Wada-socosho



Waa in darwalada xirfada leh oo kaliya, ay rakaab ama xamuul qadaan, ama koox ku wada socdaan. Haddii aad rabto in aad sameyso mid kamida intaan, waxaad u baahan tahay in aad ogaato warbixin muhiim ah.

Qaadida rakaab iyo xamuul

Inta aadan qaadin rakaab ama xamuul culus, waa in aad ogaata sida ay u saameyn karto wadida mootada. Culeyska dheeriga ee rakaabka ama xamuulka ayaa saameyn ku yeelan doono sida ay mootada u socoto, ayadoo ay kaaga baahan tahay feejignaan iyo diyaar garow hore. Sababtan awgeed, kaliya darawalada qibrada leh waa in ay qadaan rakaab iyo xamuulba. Kahor inta aadan qaadin rakaab ama xamuul culus wadadana la marin, iska fiiri lugaha aaryada ku jirta adigoo moolooyinka toosinaya si aad u ilaalso qeybta danbe ee mootada. Dib ugu laabo warbixinta qormooyinka milkiilaha ee mootada.

Kaliya darawalada xirfada iyo khibraddableh waa in ay qadaan rakaab ama xamuul culus ama koox kuwada socdaan.

Marka aad rakaab wado, waa in ay mootadaadu leedahay:

- Fadhi kursi labadiina idinku filan. Rakaabku waa in uu gadashaada fadhiya waana in uu sida ugu macquulsan kaaga fogyahay. Waa inuuusan hortaada fadhiisan wax rakaab ah intuu doonaba ha jiree.
- Waa in uu rakaabku lugaha saarta meesha loogu tala galay si uusan u dhicin adigana sidoo kale kuu jiidan.
- Gacan qabsi wanaagsan ama adag oo uu rakaabku qabsado waa in mootadu leedahay. Sidoo kale rakaabka ayaa qabsan kara dhexdaada, sinahaaga ama suunkaaga.

Qaybtaan waxay ka hadleeysa

- Marka aad wado rakaab iyo xamuul
- Koox kuwada socosho

Marka aad rakaab wado:

- Tartiib u yara soco, qaasatan marka aad gooladaha galeysa, leexashooyinka ama meelaha askari jiifka yaalo.
- Marka hore xawaaraha soo dhin, waxaa laga yaabaa in aad u baahato in aad isticmaasho bareega.
- Waxaad sugtaa fursad fiican oo aad ku gudubto, ku gasho ama aad ugu biirto gawaarida kale.
- Sameyso fogaan fiican marka aad joogsaneyso ama aad xawaaraha mootada dhimeyso.



Hagida rakaabka

Rakaabkaagu waa in uu sidoo kale xiran yahay mid lamida qalabkaaga badbaadada. Si muraajaceyn joogta, waa in aad uuga warantaa rakaabkaaga warbixinta asaasiga ee mootada inta aadan safarkiina bilaabin. Xitaa haddii rakaabkaagu uu yahay darawal mootho, waa in aad warbixin siisa inta aadan socdaalka bilaabin.

U sheeg rakaabkaaga:

- In uu mootada soo koro kaliya kadib marka aad matoorka kiciso.
- In uu lugaha ku haaya fadhiga mootada, xitaa marka ay istaagto.
- In uu lugaha ka fogeeyo salbotooyada, siliska ama qeybaha wareegaya.
- Si xoog ah u qabsado dhexda, sinaha ama goobaha qabsasho ee rakaabka.
- Adiga gadaashada ha joogo garbahaaga korkoodana ka fiiriyo meesha u socoto iyo halkaa u leexaneyso.
- Ka fogoow wadashekeysiga bilaa micnaha iyo dhaq-dhaqaqa marka ay mootada socoto

Sidoo kale, u sheeg rakaabkaaga in uu si fiican ugu dhago mootada markaad:

- Dhibaato usoo dhawaneysyo.
- Adigoo taagan aad dhaqaaqi rabto.
- Si deg dega u leexan rabto ama aad leex leexan rabto.


Culeys qaadid

Inta badan mootoyinka looguma tala gelin in ay culeys qadaan. Culeys yar ayaa si amaan ah loo qaadi karaa haddii la dhuujiyo meel fiicana la dhigo.

- Joogteynta yareynta culeyska – culeyska ku dhuuji qeybta hoose ee fadhiga hana ku dhinac xirin lugta danbe. Si adag u dhuuji culeyska, ama waxa aad gelisaa boorsooyinka dhinacyada. Ku gurida culeys dhinacyada ama fareemka mootada ee fadhiga danbe ayaa waxaa ubadalaya bartamaha culeyska mootada taaso sababeysa in uu kontoroolka ka dhumo.
- Culeyska horay usoo siki – Culeyska waxaad dhigtaa qeybta hore ama tiirkanka danbe meel ku aadan. Boorsoyinka taangiga ayaa culeyska horay u soo jaleciya, laakiin marka aad isticmaaleysyo ka feejignow qaasatan marka shey caarad leh aad gelineysyo. Iska hubi in taangiga shidaalka inuusan saameynin maareynta gacan-qabadyada. Saarida culeys tiirkanka danbe ee mootada ayaa sameyn ku yeelaneysa sida ay mootadu u leexato iyo sida ay u joogsato.
- Culeyska si siman uqeybi – boorsoyinka dhinacyada isku culeys ka dhig. Culeys aan sineyn ayaa keeni karaa mootada in ay dhinac u dhacdo. Culeys ka bato ayaa keeni kara in boorsoyinka ay qasadaan lugta ama siliska, taaso xireysa lugta danbe keenneysana in mootadu ay taraaraxdo.
- Dhuuji culeyska – Si sugar ugu dhuuji culeyska cijiro (xarig gano leh ama shabaq). Xariga cinjirka oo dhowr meelod looga xajivo dhinac walbo oo laguna dhuujiyo. Xamuul dhuuqsan ma qabsanayo lugta ama siliska, taasoo keeni karta in uu lugta xiro mootadana taraaraxdo. Xariga ayaa isjiida xirmooyinkuna waa ay dabcaan, tasoo keeni karta in uu xamuulku dhaco ama booskisa ka dhaqaaqo.

Kooxda Wada socosho

In aad dadkale wada socotaan ayaa ah waxyaabaha ugu wanaagsan ee moota wadida. Darawalada masuulka ah ayaa sidaan u sameeya hab aan cidna halis ku aheyn ama aanan fara-galineynin isku socodka gawaarida, lasocoshada mootaleyda kale ayaa ka caawin karto in aad nabab qabto laguna arko. Wada hadal iyo niyad xaadira ayaa muhiim u ah koox marka lagu wada socdo. Waa in aad muraajiceysa sida mootada loo wado kahor inta aadan koox mootoley ah aadan raacin.




Sawirka baaburta waxa laga so xigtay
Maxim Popov ©123RF.com

Si aad u horumariso badbaadada hoosna ugu dhigto halista dhaawac marka aad koox ahaan kuwada socotaan:

- Horay u qorshee
- Kooxda ha yaraato.
- Fogaantaada ilaali
- Ku socda hab kala horeyna oo sidii raadka maska - labo labo ha usoconina.
- Marka aad goolad galeysaan hal leen ku socda, leexo, marka aad laami galeysyo ama aad laamiga ka baxeysyo.

Koox ku gudbid

- Darawada foomka ku socda waa in ay mid-mid u dhafaan markiiba. Haddii leydiin dhaafayo adinkoo koox ah, haka leexanina seedkiina.
- Marka hore, waa in qofka ugu horeeya uu gudbo markay amaan tahay. Marka uu gudbo, waa in qofka ugu horeeyo uu booskiisa ku laabto si uu boos ugu baneyyo darawalka xiga ee xawaaraha gudbida kusodo.
- Marka darawalka hore uu si nabad gelyo ah ku dhaafo, waa in darawalka xigo uu dhanka midig kasoo baxo una wareego bidix sidaasna ku dhameyaan baasitaanka, ayagoo dib ugu noqonaya foomkoda sida maska socdo kale ah.
- Inta kale kooxda waa in ay sidaan oo kale sameyaan. Dhanka bidix kasoo bax oo ku laabo booska saxda ee foomka.
- Darawalka ugu horeeyo ayaa dib ugu noqonaya xawaaraha sare marka uu qofka ugu danbeyo soo gudbo.



Sawirka baaburta waxa laga so xigtay Maxim Popov ©123RF.com



TALOOYIN FUDUD: Habraaca Wadida Mootada Rakaabka Saaran Yahay

Tixgelinta Sharci

1. Dhamaan shuruucda gobolada iyo waxyaabaha leyskaga baahan yahay marka rakaab wado waa in la raaca.
2. Gobolada qaar ayaa u baahan qalab gooniya. Tusaale: mootadu waa in ay leedahay caga saarta rakaabka, rakaabkuna waa in uu lugta la gaari karo, mootaduna waa in ay leedahay boos u gooniya rakaabka.
3. Go'aanka ah in aad caruur qaado, ayadoo laga soo qaadayo in dhamaan shuruudan uu kasoo baxay, waxee saaran tahay waalidka ama masuulka ilmaha. Iska hubi in ilmahu uu garasho uu ku qaado masuuliyad leeyahay, uuna dheeryahay si uu caga saarta u gaaro, xiran yahay koofi si fiican u le'eg iyo qalabka kale ee difaaca, waa in uu kugu dhagaa ama meelaha la qabsado ee mootada. Iska fiiri shuruucda gobolkaaga, dhowr gobol ayaa dajiyay da'da ugu yar ee lagu qaadi karo mooto.

Diyaar Garowga Darawalka

1. Rakaabku waa in laga soo qaada sidii "darawalka" labaad si ay kaaga caawiyaan badqbka iyo in sida saxda ah loo raac habraaca motada lagu wado.
2. Rakaabka ayaa saameyn ku yelanaya socodka mootada sababto ah xuleyskiisa iyo dhaq-dhaqaaqisi goonida.
3. Rakaabka ayaa laga yaaba in si dhaqsiya horay ugu soo dhaqaaqo marka aad joogsaney-so hadibna koofiyadihiina isku dhacaan.
4. Markaa adigoo taagan dhaqaaqeysyo waxaa laga yaaba in aad cadaadis sheelare iyo firisiyone u baahato.
5. Habka aa bareega u qabto ayaa saameynta soo gaari kartaa. Waxaa loo baahan karaa inaa waqtii hore bareega soo qabato iyo/ama in aad cadaadis badan uu kaaga baahdo.
6. Culeys badan oo lugta danbe saaran ayaa laga yaabaa in uu u fiican yahay awooda bareega danbe markaa joogsaneyso, qaasatan xaaladaha joogsi deg-dega kaaga baahan.
7. Marka aad dalcad kadageyso waxaa badaneya fogaanta aad ku istaageyso marka loo fiiriyo dhulka siman.
8. Feejignaan dheeriya ayaa gooladaha lagaaga baahan yahay culeyska kusaaran awgii. Habka aad goolada u gasho ayaa saameyn soo gaari kartaa.
9. Waqtii badan iyo boos weyn ayaad u baahan tahay marka aad gawaarida kale dhaafayso.
10. Sameynta dabeysa qaasatan mida dhinaca kaaga dhaceysyo ayaa sameyn weyn yeelan karta.

Diyaarinta Mootada

1. Mootadu waa in loo naqshadeeyay si ay u qaadi karto rakaab.
2. Waa in aad dib u eegta warqada mootada ee warshada warbixinteda ku sabsan qaabka mootada iyo tallooyinka sida loo isticmaali karo.
3. Mooloyinka mootada iyo aaryada lugaha ayaa u baahan karo in wax laga qabto.
4. Waa in laga taxadaraa in aan laga gudbin xadka culeyska ku xusan warqada mootada.

Diyar Garowga Rakaabka

1. Rakaabku waa in uu dheer yahay gaari karana caga saarta, waa in uu caqli masuuliyad ku qaado leeyahay.
2. Rakaabku waa in uu xirta qalabka ku haboon ee bad baadada.
3. Rakaabku waa in looga warama warbixinta badbaado (fiiri #7 hoos).
4. Rakaabku waa in uu iska soo qaado darawalka labaad waana in uu masuuliyada bad baado la wadaaga darawalka.

Tixgelinta Warbixinta Bad-baadada Guud

1. Waa in aad qibrad u leedahay sida ay mootada u shaqeyso niyadaaduna ku jirto bad-baadada laga rabo iyo masuuliyada rakaabka kuu saaran.
2. Waxaad isticmaasha xawaare hoose firisiyonaha/sheelaraha u koontorol sidoo kalena bareega deg-dega ee goobaha halista yar sida beerta nasashada, adigo rakaab wado.
3. Si feejigan u gal gooladaha sidoo kalena baro xirfadaha goolad gelida si adiga iyo rakaabkaaguba u bad baadan.
4. Taxadar markaa gooladaha galeysa maadama laga yaabo in ay ku saameyso.
5. Isticmaal MSF Indho-indheyn, Qiimeyn, Fulin xeeladeed (SEESM) si aad waqtii iyo boos fiican u hesho.
6. Sii waqtii uu rakaabku iskugu toosiyo dareenka xawaaraha iyo soo jaleecashadiisa; xaawarahu waa in uu ahaada mid amaana suurto galna ah ilaa uu rakaabku si fiican mootada ugula qabsanaayo.
7. Hubi in rakaabku uu tixgelinayo habraacyada badbaado:
 - a. Waxaa loo baahan yahay qalabka badbaadada oo dhameystiran in si fiican loo isticmaalo.
 - b. Rakaabku waa in uu qabsado dhexda ama simaha darawalka ama meelaha loogu tala galay in uu qabsado.
 - c. Lugaha ku haay caga saarta mar walbo, xitaa marka ay mootada taagan tahay.
 - d. Lugaha iyo gacmaha ka ilaali meelaha kulul iyo goobaha wareeganaya.
 - e. Marka aad goolad galeysa, fiiri garbaha darawalka ee dhanka uu u leexanayo.
 - f. Iska ilaali in aad is warejiso ama inaad dhaq-dhaqaaq deg-deg ah oo saamayn kartowadidda samayso.
 - g. Haddii aad shey ka gudbeysaan, ku istaag caga saarta jilbaha oo yara laaban adigoo u ogolaanaya in jugta xoogeeda ay jilbaha ku aadan yihiin.
8. Waqtii badan sii marka lagu dhaafayo.
9. Diyar u ahaaw in aad dabeysha iska xajiso.
10. Iska ilaali xaaware sare iyo in aad saa'id isku qaloociso.
11. Udiyar garow "jugta" rakaabka ee koofidiisa ama jirkiisa oo dhan in uu horay usoo tarraaxo marka aad xoog u joogsaneyso.
12. Rakaabka hasoo koro mootada kadib marka aad fadhiga kor u qaado iyo marka aad mootada iska dhuujiso. Bareega hore qabo haddii uusan dhulka labeel aheyn.
13. Marka hore rakaabka haka dago mootada.
14. Sanad walbo samee koorsda **Asaasiga ee RiderCourse 2 – Xirfadaha maareynta ee rakaabka**.
15. Rakaabka joogtada ah ha sameeyaan koorsada **Asaasiga ee RiderCourse** si markaa ay sifiican ugu fahmi karaan shaqada qofka mootada isticmaalaya.



TALOOYIN FUDUD: Habraaca MSF ee Kooxaha Mootaleyda

Moota wadida ayaa sideedaba howl shaqsi ah, laakiin dad badan, ayaa koox ahaan u wada socdo - haday tahay saaxiibo subaxa Axada wada socdo ama dibad bax diyaarsan oo mootaleyda - waa tusaala ugu fiican ee lagu dareemi karo moota wadida. Halkan waxaan kugu siineynaa waxyaabaha kaa caawinya inaad ku damaashadaan si amaan ah koox ahaan:


Imaaw adigoo diyaar ah. Waqtii la qabtay ku imaaw adigoo taangiga shidaalka kuu buuxo.

Shiritaanka darawalada qabsada. Kawada hadla wadada, nasashada, shidaal qaadashada, iyo fariimaha gacmaha (fiiri sawirka bogga 61). Isku doorta qofka idii hogaaminayo iyo qofka ugu danbeynayo. Labaduba waa in ay ahaadaan darawalo qibrad leh aadna u yaqaan habraacyada kooxaha mootoyinka. Hogaamiyuhu waa in uu ka war qabo xirfada darawal kasta kahor inta aan la dhaqaaqin waana in uu ka warqabo inta la socdo.

Tirada kooxda ha ahaato mid lamaareyn karo, waxa ugu fiican todobo ilaa shan mootho.. Haddii ay lagama maarman tahay, kooxda ukal jabiya kooxo yar yar, dhowr sakinna kala danbeeyo ayadoo koox walbo ay leedahay hogaamiye hore iyo mid danbe.

Wadidda oo la diyaariyo. Ugu yaraan hal darawal oo idinka mida waa in uu qalabka gar gaarka deg-dega oo dhameystiran hayo, dhamaan darawaladuna waa in taleefan wada wataan, marka kooxdoo waa in ay diyaar u ahaato dhibaato kasta oo qabsan karto.

Kusocda qaab. Qaabka sida raadka masko kale (fiiri sawirka hoose) isku ogolaada fogaan macquula in ay mootoyinka u dhaxeysyo si markaa darawal walbo uu u helo waqtii iyo fogaan uu ku dhaq dhaqaaqo ama khatarta kaga falceliyo. Hogaamiyuhu waa in uu ku socda bidixda sadaxaad ee seedka, halka darawalka xigana uu ugu yaraan hal sakin ka danbeeyo dhanka midigta sadaxaad ee seedka; inta xigta ee kooxduna waa in ay qaabkan raacda. Hal leen oo ugu yaraan 2 sakin fogaan ah lakala dabeeeyo ayaa wanaagsan marka goolad lagalayo, marka aan waxbo la arkeynin ama wadada ay xuntahay, marka laamiga weyn lagalaayo, ama xaaldaha kenaya foganta la dheereyo si markaa logu dhaq dhaqaaqi karo haddii loo baahdo.




Ka fogow qaab garba socoda, waxa ay yareynaysa fogaanta falcelin. Haddii aad isla markiiba aad u baahato in aad waxka wareegsato ma heleysid firsad aad sidaa ku sameyso. Ma rabtid in gacan-qabadyada ay kaaga dhagaan meel.

Si joogto ah ooga warqab mootooyinka kaa danbeeya adigoo fiirinaya haadadka. Haddii aad aragtid mooto sii gaabineysa, tartiibso si ay kuuso gaarto. Haddii dhamaan darawalada ay habraacan isticmalaan, kooxdu waxa ay awood u heleysa in joogteyso xawaaraha ayadoo aanan lagu qasbaneyn in xawaara la kordhiyo si leyskaga daba yimaado.

Haddii aad kooxda ka harto, ha wal walin. Kooxdaadu waa in ay leedahay qorshe hore loo dajiye oo dib loogu midoobi karo. Sharciga ha jabinin ama xawaare sare haku socon si aad usoo qabato.

Farsamo ama ciladaha farsamo, isticmaal taleefan oo waco kaalmo sida markaa ay xaaladu mudan tahay.

Haddii ay mooto ka dhex baxdo inta lawada socdo, waa in inta kale ee kooxda ka hartay ay isku kala gooshaan ayagoo foomka hagaajinaya mid walbana booska laga baxay buuxinaya. Inkasta oo ay u muuqaneyso in darawalka tooska ugu aadan ay ku fiican tahay in uu soo galoo, laakiin laguma taliyo sababtoo ah in mooto kale aad garaba siman ku dhaaftid ayaa halisteda leh.



MSF's Habraaca Koox Wada-socosho: Calaamadaha Gacanta

<p>Joogso – gacmaha oo raaraco, calaacaluhuna gadaal u jeedaan</p> 	<p>Hal feel – gacanta iyo farta oo fidsan</p> 	<p>Daar leerka calamadeynta – ku fur ama ku xir farta iyo suulka gacanta</p>  
<p>Xawaare dhimid – gacanta toos u fidi adigoo calaacasha hoos aadinya</p>  	<p>Iabo feel – farta iyo far dhexaadka oo toos u fidsan</p> 	<p>Shidaalka – gacan fidsan oo tilmaameyso keydka shidaalka</p> 
<p>Xawaareynta – gacanta oo toos u fidsan, calaacasho kor aadisan</p>  	<p>Halista Wadada – dhanka midig, ku tilmaam lugta midig; dhanka bidix, ku tilmaam gacanta bidix</p>  	<p>Joogsiga nasasho – isku xir faraha, suulka ilaa afka</p> 
<p>Waxaad hogamisa/timaada – gacanta oo u fidsan xagal 45 digii kor ah, calaacasha oo kor farta tilmaameyso, u lic licaneyso horay iyo gadaal</p>  	<p>Leer fuel ah – waxaad ku taabata dusha koofida mootada calaacasha oo hoos aadisan</p> 	<p>Joogsi raaxo leh – gacmaha horo fidsan, duub feer oo laaban hoosna u jaleecan</p> 
<p>Isoo daba kac – gacanto toos u fidsan garab ilaa calaacasha</p> 	<p>Joojin – gacanto u taala dhanka midig, garcmaha hore oo u raaraca dhanka garabka</p>  	

Tijaabi aqoontaada

1. Rakaabku waa inuu:

- A. Fiiriya garbaha darawalka mootada ee dhinaca uu u leexanayo ama goolada.
- B. Ha ku dhagin darawalka mootada ebid.
- C. Meesha ugu danbeeyso mootada fadhiiso.

2. Foom nooce ah ayaa laga rabaa in aad sameysaan marka koox kuwada socotaan?

- A. Hal leen oo toosan.
- B. Garbo socosho.
- C. Qaabka raadka maska oo kale.

1. A – bogga 53-54, Hagida rakaabka

2. C – bogga 54, Koox wada socosho

Darawalada mootooyinka qaar wax

dhib ah uma arkaan in ay

darawalada kale arkaan.



Laakiin ma tihid geesi waxba karin.

Ka Dhex Muuqo.



Walxa Saameeya Waditaanka Mootada

Wadida mootada waxa ay u baahan tahay maskax aad u feejigan iyo xirfad jir ahaan. Mar marka qaar isbadal ayaa agagaarkaaga ku imaan kara, wawa ayna saameyn kartaa aragtidaada. Sidoo kale isbadal muuqda ayaa imaan karo, wawa uu saameyn karaana awoodaada wadida mootada. Darawalda masuulka ah wawa ay ogyihiin sida ay isku badali karaan ama ay uga gudbi karaan caqabadaan saameynaya.



Cimilo qaboow

Naftaada ilaali marka aad cilimo qaboow ku socoto adigoo xiranaya qalabkasida jaakad dabeysha karin iyo dhar aan qabowga gudbin. Waxaa wanaagsan in aad xirato dhar kala koreeyaa si markaa aad iskaga saari karto sida ugu baahan tahay. Haddii aad dharkan jaakada dhaxanta aad ku sii darto wawa ay jirka ka ilaalinseysaa in uu qabowga gaaaro.

Cimilada qabow ayaa dheereyneysa waqtiga aad ku fal celin karto. Si aad uuga hor tagto xawaaraha hoos u dhig waxaadna kor dhisaa fogaanta daba socosho iyo mida dhinac yada.

Jir qaboobidda (Hypothermia)

Qabowga haddii aad waxbadan ku socoto wawa uu hoos u dhigi karaa heerkulka jirkaaga taaso keeni karta in rir qaboobid kugu dhacdo.

Calaamadaha jir qaboobidda (hypothermia) waxaa kamida:

- In jirkaagu dacifo waxna qaban kari weyso
- Caqli xumo, jahwareer kugu dhaco
- Tamar la'aan aad wax ku qabato
- Qar qaryo
- Murqaha oo adkaada
- Neefta oo kugu yaraata

Qaybtaan waxay ka hadleeysa

- Cimilo qaboow
- Cimilada aadka u kulul
- Habeen socosho
- Socod mashquula
- Caajis

Haddii aad dareento qabow daran, wadada ka dag fursada ugu horeyo aad hesho oo qabowga meel aad ka gasho raadso. Wax kulul cab, dadka qaar ayaa aala miiteyo si ay isku kululeyaan, dharka qoyana iska badal.

Cimilada aadka u kulul

Cimilooyinka aadka u kulul, xiro qalabka badbaadada ee meelaha uu ka neefsado leh si aad naftaada uuga ilaaliso fuuqbox iyo in kuleelka ku xiijiyo. Wali waxaa muhiim ah in aad jaakad xiratosarwaal dheer si aad isku ilaaliso haddii aad shil gasho. Biyo badan cab. Haddii aad saa'id u kululaato, joogso.

Habeen socosho

Habeen socoshada ayaa keeni karta halis dheeriya sababtoo ah awoda darawalka mootada in uu wax arko ama la arko ayaa aad u yar. Waa in aad isku bad badashaa sidaa u socoto si aad u xaliso aragti yarida lagu arkaayo ee:

- **Dhimida xawaaraha** – Kusoco xawaare ka yar midka caadiga ee aad maalinta uu roob jiro ku socotid. Leerarkaaga hore ha daminin, tani waxa ay siyaadin doonta fursada aad ku arki laheyd halista suurto galaka ah.
- **Dheeraynta masaafada** – Fogaanta waa ay adag tahay in aad qiyasto habeenkii marka maalinti loo bar-bar dhigo. Waxaad u jirsataa fogaan dhan afar sakin ama wax kabadan. Waxa aadna sameysaa fogaan laguugu dhaafo adna aad wax ku dhaafsto.
- **Isticmaalida gaariga kaa horeeyo** – Leerarka gaariga kaa horeyo ayaa kaa caawin kara inaad sifican u aragto wadada si ka fiican leerarkaaga xitaa. Leerarka danbe ee damaya daarmaya ayaa kaa caawin kara kadigida askari jiife ee kaa horeeyo ama wadooyinka rafta ah.
- **Isticmaalida leerkaaga fuulka ah** – Ku xiro inta leer aad heli karto. Isticmaal leerkaaga fuulka ah xitaa marka aadan daba joogin ama aadan la kulmeyn gaari.

- **Ahaaw mid muuqda** – Xiro indho qabad shey leh habeenki marka mootada wado.
- **Seedka ufur furnow inaad isku badasho** – Seedkaaga badalo si markaas aad sifican ugu arki karto wax, laguu arki karo, ama aad uheli karto firaaqo fiican.

Socod mashquula

Mashquulis ayaa ah wax kasta oo niyadaada ka weecin karo wadida mootada. Mashquulinta darawalka mootada ayaa dhici karta ama ku dhici karta markasta iyo meel kasta. Darawal mashquulsan waxuu keeni karaa shil, taaso keeni karta dhaawac, dhimasho ama qasaare hanti. Indhaha oo aad ka qaado wadada ama isteerinka mootada ayaa keeneyso halis weyn. Wax kale oo aad ka fikirto ama ku mashquusho maskaxiyan inta mootada wado ayaa si lamida aad halis u ah. Waa in niyadaadu ay kaliya xooga saarta wadida mootada. Gabi ahaan kaligaa ayaa masuul ka ah wadida mootada iyo badbaadadeda.

Caajis

Caajiska ayaa saameyn karo sidaa u kontoroosho mootada. Si aad meesha uuga saarto halista caajiska:

- Hurdo fiican seexo habeenki – Nasiino wanaagsan habeenki ayaa muhiim u ah ka hortaga caajiska.
- Ka difaac naftaada walxaha sida – Dabeysha, qabooowga iyo roobka dhaqsi ku daalinaya. Xiro dhar qabowga kaa ilaaliya. Muraayada hore ayaa muhiim ah haddii aad qorsheynayso in aad safar dheer gasho.
- Isu bad badal xawaaraha iyo fadhiga – Isbad badalyadaas yar ee ka imaanaya xawaaraha isbadalaya ama booska aad badalaneysa ayaa ka xoog badin karo saameynta caajiska.
- Si joogto ah u naso – Joogso oo ka dag mootada labadii saacba mar ama sidaad hadba ugu baahan tahay.
- Ha isticmaalin dawo tamar siin ah – Tamar siinta beenta ah inta badan waxa ay keenta caajis daran ama wal-wal badan/dibreshan marka ay kaa dhamaato. Darawalada mootada ma awoodi doonaan in ay xooga saaraan shaqada ay gacanta ku hayaan.

Tijaabi aqoontaada

1. Marki aad habeenki wado:

- Isticmaal dhinaca bidix ee seedka si aad u aragto gawaarida kale ee kaa horeysa.
- Gaariga kaa horeeyo agtiisa ku soco haddii leerkiiisa aad wax ku arkeyso si fiican.
- Xawaarahaaga dhin si aad sare ugu qaadan fursada ah in aad halista iska ilaaliso.

2. Si aad meesha uuga saarto halista caajiska:

- Raadiyaha daaro.
- Si isdaba joog ah u naso.
- Kaffee cab.

1. C – bogga 62-63, Habeen socosho

2. B – bogga 63, Caajiska

Gawaarida Sadaxda Lugood leh




Qeybta waxaa ka helaysa xogta kaa caawineysa u diyaar garowga wadida mooto sadax-lugoodleya. Sharciga leysinka Michigan waxaa uuga soo hadalnay bogga 12

Dhaqamada guud ee lagu wado mootooyinka sadax lugood leyda iyo kuwa fadhiga dheeriga wato

Noocyada gawaarida sadaxda-lugood leh

Sida
caadiga-mootooyinka labada lugood leh ayaa loo tixgeliyaan gawaarida halka dhabo mara. Gawaarida sadax lugood ka ah ayaa lahaan karo labo ama sadax lugood ay ku socdaan. Gawaarida labada lugood leh ayaa ah mootooyinka fadhiga dheeriga dhinaca ku leh, halka gawaarida sadaxda lugood leh (trikes) ay lahaan karaan labo lugood oo afka hore ama xaga danba ah.



Farqiga u dhaxeyo mootooyinka labada lug leh iyo kuwa sadaxda lugood leh

Gawaarida sadaxda lugood ah ayaa sida caadiga ka dagan kuwa labada lugood leh. Hase ahaate, marka xaalada loo fiiriyoo "waa ay gadoomi kartaa" ama hal lug ayaa wadada kor uuga qaadmi karta. Si xassilooneedaa

Qaybtaan waxay ka hadleeysa

- Dhaqamada guud ee lagu wado mootooyinka sadax lugood leyda iyo kuwa fadhiga dheeriga wato
- Dabeecadaha goonida ee mootooyinka sadax lugoodka
- Dabeecadaha goonida ee mootooyinka fadhiga dheeriga dhanaca ku wato
- Macluumaa dheeraad ah

loo hubiyo, waxaad u baahan tahay in aad xooga saarto jirkaaga booskiisa, xawaarahaaaga iyo sida aad xamuul u saarto sadax-lugley.

Gawaarida sadax lugleyda ah ayaa si nooc kale ah loo wadaa. Maadama gawaarida sadax lugleyda aysan qaloocan, lugta hore ee gaariga ma soo jaleecan karo, lugta hore waa in aad ku aadisaa jihada aad rabto in aad aado.

Isbar gaariga waxuu yahay

Iska hubi in aad fahansan tahay sadax lugleyda inta aadan wadada saarin kahor. Marka hore waa in aad aqrисaa warqada lasocoto. Xasuusnow in sadax lugleyda ay isbees badan qaadato marka loo fiiriyoo mootada caadiga, sidaas dartedna, waxaad u baahan tahay isbees weyn oo aad ku dhaq dhaqaqdo.

Sidaad jir ahaan u fadhisaneyso

Sida aad u fuusho waxa ay muhiim u tahay sidaa u koontoroleyo sadax lugleyda. Waa in aad gaari karto gacmaha isteerinka si fiican adigoo marka aad isjaleecineyso ama jirkaaga dhaq dhaqaajineyso.

Leexasho

Gooladaha ama marka aad jiirooyinka u galeysosi taxadar leh. Haddii aad goolad xoog ku gasho, waxaa dhici karta in aad seed kale gasho, in lug ay dhulka ka qaadmato ama ay wadada ka baxdo. In aad wada jarto isteerinka ayaa keeni karta in mootadu taraaraxdo ama kontoroolka ka dhumo.

Buuraha yar yar

Marka aad dalacaad koreyso adigoo wada sadax lugley, culeyska qaar ayaa lugta danbe fuulaya, taas oo keeni karta in lugta hore ay adkaato. Isbadalka culeyskan ayaa hoos u dhigaya qabsiga laamiga ee lugtaha ee marka aad leexaneyso iyo markaa joogsaneyso. Waa in aad jirkaaga qeyb kamida horay u jaleeciso si aad u koontorosho isterinka.

Marka aad dalcad ka dageyso, waxaad u baahan tahay in aad kordhiso awooda bareega si aad xawaaraha u dhinto ama aad u joojiso gaariga. Wuxuu muhiim ah, sidaas darteed, in aad marka hore xawaaraha soo dhinto kahor inta aadan goolada gelin ama aadan joogsan.

Booska seedka

Balaca mootooyinka sadax-lugleyda waxuu la mid yahay midka gawaarida qaar, sidaas darteed, marka laga reebo mootada labo lugleyda, waxaad ku xadidan tahay seedka laamiga. Isku dhix ilaalii dhix bartanka seedka iyo calaamadaha seedka.

Booska seedka marka aad koox ahaan uwada socotaan waa muhiim in aad tix geliso. Ku socda hal leen oo toosan, afar sikiinna ugu yaraan, ha idiin dhaxeysyo gawaarida kale.

Istaagida laamiga dhinaciisa


Mootada baakinka dhig si garbo siman la ah dhinaca laamiga. Bareeg baakinka geli ama geer uuga tag si aysan mootada u taraarin. Dhinac dhigashada laamiga waxa ay kaa caawineysaa in aad si fudud ooga soo baaxdo baakinka laamiga seedkana aad u gasho.



Sawirka baaburta waxa laga so xigtay Maxim Popov©123RF.com

deg ah. Leex leexashadu waa waxa ugu wanaagsan ee aad sameyn karto si aad isku dhac uuga fogato.

Haddii loo baahdo inaad leex leexasho, bareeg qaba kahor ama kadib inta aadan leexan, adigo barega hayo waliga ha leexan. Ha isku dayin in aad is wada jarto adiga oo tobar fiican laheyn. Haddii aad u baahan tahay in aad isku dhac iska ilaaliso fursada ugu wanaagsan ayaa ah in aad bareega xoog u qabato.



Sawirka baaburta waxa laga so xigtay Maxim Popov©123RF.com

Gooladaha iyo leexashoyinka

Marka aad gooladaha galeysyo, xasuusnow in aad seedkaaga ka bixin.

Xawaarahaaga isbadal ku samee inta aadan goolada gelin kahor. Waxaad u baahan tahay in aad u jaleecdo ama aad culeyskaaga u badiso dhinaca aad u leexaneysyo si aad uuga ilaaliso lugaha mid kamida in ay dhulka ka kacdo, ama suurto galnimada in uu kontoroolka kaa dhumo.



Sawirka baaburta waxa laga so xigtay Maxim Popov©123RF.com

Dabeecadaha goonida ee mootooyinka sadax lugoodka

Leexasho

Sababtoo ah culuyska sadax lugleyda ayaa si is le'eg ugu qeybsan labad lugoodo hore ama labada danbe, gawaaridan si lamida ayee si isku mida bidix ama midig loogu leexiya.

Leexinta sadax-lugleyda

- In aad goolada ugu soo dhawaato adigoo madaxa kor u qaadaya iskana fiirinaya goolada.
- Xawaarahaaga maarey inta aadan goolada gelin kahor si aad markaa si amaan leh ugu xawaareyn karto goolada.
- Ujaleeco ama culeyskaaga u badi dhinaca aad u

Seed badalasho deg-deg ah

Gaari sadax lugley ah uma fud-fududa sida mootada labada lugood leh, marka waxaa muhiim ah hortaada si fiican iskaga fiiri si aad ooga baaqsato leex leexasho deg-

- leexaneyso.
- Isteerinka lugta hore u leexi dhinaca aad u leexaneyso.
- Xawaarey marka aad kasii baxeyso goolada.

Dhaqsi joogsasho

Dabeecad muhiima ee mootoyinka caadiga in aad ka war qabto ay tahay (hal lug afka hore ah, labo lugood xaga danbe) in labo lugood danbe ay

bareeg xoog badan yihii. Sida ay ukala duwan yihii naqshadaha sadax-lugleyda. Tan waxaa sabab u ah in uusan culeyska u gudbin lugta hore ee sadax-lugleyda marka bareeg xoog badan la qabanayo. Culeyska intiisa badan waxuu saarmayaa lugaha danbe tana waxa ay bareega ka dhigeysa mid wanaagsan. Bareega hore waxa ugu fican yahay sadax lugleyda marka laba lugood oo hore ay leedahay, iyo hal lug danbe, halkas oo culeyska uu u guurayo lugaha hore marka bareega la qabanayo taaso ka dhigeyso lugaha hore wax ku ool.

Qaadida rakaab iyo xamuul


Kaliya darawalada xirfada leh waa in ay qadaan rakaab ama xamuul culus. Culeyska dheeriga ama xamuulka ayaa wax ka badalaya habka loo wado mootada.

Hadii aad rakaab wado waa in uu meesha kugu toosan gadaashada fadhiisto. Marka aad xamuul wado, waa in aad dhex bartanka ku aadisa si aad u sinto culeyska dhinacyada. Dib ugu laabo buuuggacmeedkaaga milkiilaha ee mootada si aad u hesho warbixin dheeriya.

Dabeecadaha goonida ee mootoyinka fadhiga dheeriga dhanaca ku wato

Joogsiga

Ka fiiri kursiga dheeriga ee dhinaca in uu bareeg leeyahay. Kuraasta qaar ayaa bareeg leh halka



qaarkoodna aysan laheyn. Fogaanta aad ku joogsan karto iyo sidaa u socoto waxaa saameyn ku yeelanayo in uu kursiga bareeg leeyahay iyo in kale. Waxaa laga yaaba in aad u baahan tahay in aad u leexato dhinac kursiga dheeriga marka aad bareega qabaneyso haddii kursiga dheeriga uusan laheyn bareeg.

Xawaareynta

Marka aad xawaareyneso, iska ilaali u leexashada dhinac kursiga dheeriga si aad wado toosan ugu socoto.

Leexasho

Marka aad wado mooto leh kursiga dheeriga, waxaa loo baahan yahay in aad leedahay feejignaan dheeriya ee dhinaca aad u leexaneyso iyo inta uu yahay culeyska saaran kursiga dhinaca. Marka aad leexineyso mooto leh kursiga dheeriga:

- Waxaad qiimeysa cabirka leexasho ee loo baahan yahay.
- Xawaarahaaga maarey inta aadan goolada gelin kahor si aad markaa si amaan leh ugu xawaareyn karto goolada.
- Ujaleeco ama culeyskaaga u badi dhinaca aad u leexaneyso.
- Joogtee xawaaraha marka aad goolada galeyso.
- Xawaarey marka aad kasii baxeyso goolada.

Leexasho bidixda

Marka aad bidix u leexaneyso, kursiga dheeriga ayaa xajye kuu matalaya, marka asaga ayaa dhulka yaalaya. Hase ahaate, haddii aad xoog uwada leexato ama xawaare sare ku leexato, waxa ay keeni kartaa in lugta danbe ay dhulka ka kacdo iyo in afka hore ee kursiga uu laamiga taabto.



U leexashada midiga

Leexasho dhinac midiga oo xawaare sare ama aad isteerinka loo wada jaray ayaa keeni karta in kursiga dheeriga lugtiisa dhulka ka kacdo. Kicitaankan ayee ku xiran tahay haddii ay ebar tahay ama culeys yar uu ku jiro. Wuxaad iskaga ilaalim kartaa in lugta ku kacdo adigoo xawaaraha dhimaya inta aadan goolada gelin iyo in aad culeyskaaga aad dhinaca goolada u badiso, dhinaca kursiga.



Dhaqsi joogsasho

In aad si dhaqsiya leen toosan ugu istaagto ayaa ah habka ugu muhiimsan ee aad kaga fogaan karto isku dhac gaawarida kala.

Mar walbo bareega hore iyo kan danbe isla qabo, cadaadis kala duwan oo weyn saar bareegyada inta uusan mid kamida taayarada taraaraxin. Haddii lugta hore ay taraaraxdo, cadaadiska kadaa bareega si aad markale awood ugu hesho in aad kontoroosho mootada. Haddii bareega danbe uu taraaraxo, haka fuqin bareega mootada ilaa ay gabii ahaanba ka istaagto. Haddii kursiga dheeriga uu bareeg leeyahay, lugtaasna ay bilaawdo in ay taraaraxdo, waad iska dhaafi kartaa wax dhiba malahan.

Waa wax adag inaad is dega ugu istaagto goolad, qaasatan haddii ay wadadu u qaloocdo dhinaca midig. Bareeg xooga adigoo ku jira goolad dhinac midig ayaa inta badan keenta in lugta gursiga dheeriga ay dhulka ka kacdo taaso u baahan culeys dhiiriya in aad ku maareyso si aad midig ugu leexato. Ku joogsiga goolad dhinaca bidixa ayaa ka halis yar sababtoo ah waxaa jirto halis yar oo ah in ay dhacdo. Iyo, hadii ay lugtu sibiqdo, mootada ayaa u taraaraxeyso garabka wadada, ee ma aadeyso seedka kale ee wadada.

Qaadida rakaab iyo xamuul

Kaliya darawalada xirfada leh waa in ay qadaan rakaab ama xamuul culus. Culeyska dheeriga ama xamuulka ayaa wax ka badalaya habka loo wado mootada. Waa in aad ka firkirtaa dhinaca rakaabku fadhiyo iyo sida uu culeyska u saaran yahay. Meesha ugu fiican ee rakaabka waa kursiga dheeriga ee mootada. Iska ilaali in aad gadaashaada rakaab ku qaado ayada oo uu kursiga dheeriga ebar yahay. Tan ayaa kor u qaadeyso halista in aay kula gadoonto mootada. Haddii labo rakaab wado, midka culus ha fadhiisto kursiga dheeriga si aad wadida mootada kugu fududaato. Rakaabka gadaashada fadhiyo waa in uu si toosa u fadhiyo mar walbo. Muhiim maahan in rakaabku kula jaleecdo marka aad gooladaha galeyso. Marku uu culeys ku saaran yahay, gaarigaagu wuxuu u baahan yahay waqtii badan iyo masaafuu ku joogsado. Wuxaad u baahan tahay in aad kordhiso fogaanta idin dhaxeyso gaariga kaa horeya.

Marka aad xamuul ku wado kursiga dheeriga, waa in aad dhex bartahama hoose dhigto, kuna xirto sid adag. Haddii uu xamuulku dhaq dhaqaqo, wadada ayey saameynesa.

Warbixinaha dheeriga ee ku saabsan mootoyinka sadax-lugleyda ah

Halkan waxaad ka heli kartaa warbixinaha dheeriga ee ku saabsan mootoyinka sadax-lugleyda ah.

Maamulka Wadooyinka iyo Bad-baadada Gawaarida Qaranka (NHTSA) bogga:
NHTSA.gov/Safety/Motorcycles

Aasaaska Badbaadada Mootada (Motorcycle Safety Foundation - MSF) boggeeda internetka ayaad ka heli kartaa warbixinta:

- Adiga iyo mootadaada 3-lugleyda: Wadida Talooyin:
MSF-usa.org/downloads/3w_tips.pdf
- Koorsada tobabarka ee MSF 3WBRC:
MSF-usa.org/downloads/3WBRC_Student_Handbook_2010.pdf

Tijaabi aqoontaada

1. Waa maxay labada farqi ee weyn ee u dhaxeeyo mootooyinka labo lugleyda iyo sadax-lugleyda?

Gawaarida sadax-lugleyda:

- A. Ma sugna, ayadoo lagu leex leixinayo in lugta hore dhinacaad rabto u qaloociso.
- B. Way sugnaan badan tahay, laakiin waa ay gadoomi kartaa waxaana lagu leexiyya ayada oo lugta hore la aadinayo dhinaca ay u leexaneysyo.
- C. Way sugnaan badan tahay, laakiin waa ay gadoomi kartaa waxaana lagu leexiya ayadoo la aadinayo lugta hore dhinaca loo leexanayo maahe dhinaciisa kale.

2. Marka aad kuwada socotaan koox sadax-lugleya waa in aad:

- A. Kusocotaan hal leen ayadoo fogaan afar sakin dhan idiin dhaxeysyo.
- B. Kusocotaan qaabka raadka masko kale ayadoo afar sakin fogaan dhan idiin dhaxeysyo.
- C. Kusocotaan hal leen ayadoo hal sakin fogan dhan idiin dhaxeysyo.

3. Marka aad leexineysyo sadax-lugley, sidee ayaad goolada ugu soo dhawaaneysa?

- A. Madaxa ood kor u qaado adigoo xawaraha maareynaya.
- B. Adigoo madaxa hoos u dhigaayo oo xaawareynayana.
- C. Adigoo madaxa hoos u dhigaaya xawaarahana bad badalaya.

4. Marka aad u joogsaneysyo si deg-deg ah lugta horena ay taraaraxdo, waa in:

- A. Lugta ay xiraanto ilaa mootada ay gabi ahaan ka istaagto.
- B. Cadaadiska aad ka qaado si aad kontoroolka isteerinka dib ugu soo celiso.
- C. Gacmaha isteerinka aad xoog u qabato sheelarahana ka kacdo.

1. *B – bogga 64, Farqiga u dhaxeeyo mootooyinka labo-lugleyda iyo sadax-lugleyda*

2. *A – bogga 65, Booska seedka*

3. *A – bogga 65-66, Leexinta sadax-lugley*

4. *B – bogga 66, Joojinta deg dega*

Su'aalaha tusmada ah ee tijaabada aqoonta


(Jawaabaha waxa ay ku yaalan dhamaadka qeybtan)

1. Waxa ay UGU muhiimsan tahay in aad bareega falaashto marka:
 - (a) Lagugu joojiyo isgoyska.
 - (b) Aad xawaaraha xoog u dhimi rabto.
 - (c) Calaamada joogsashada kaa horeyso.
 - (d) Aynan leerarka calaamadaha aysan shaqeynenin.
2. Bareega lugta HORE meevo ayuu bixiya awooda xooga lagu joogsanayo?
 - (a) Ku dhawaad boqolkiiba shan iyo labaatan.
 - (b) Ku dhawaad Boqolkiiba konton.
 - (c) Boqolkiiba todobaatan ama wax ka badan.
 - (d) Dhamaan awooda joogsiga.
3. Si aad si sax ah ugu leex leexato:
 - (a) Si dhaqsiya culeyskaaga u dhaqaaji.
 - (b) Gacan-qabadyada isla markiiba leexi.
 - (c) Uriix gacanta isteerinka dhinaca aad u leexaneyso.
 - (d) Uriix gacanta isteerinka cagsiga dhinaca aad u leexaneyso.
4. Haddii ay lugti banjarto intaad socoto, aadna ku qasbanaato in aad joogsato, inta badan waxaa wanaagsan in aad:
 - (a) Yara daciso gacmaha isteerinka.
 - (b) Culeyskaaga aad u wareejiso lugta fiican.
 - (c) Sheelaraha aad ka kacdo.
 - (d) Labada bareeg in aad isla qabato dhaqsina joogsato.

5. Gaarigan hoose ayaa sugaya in uu soo galoo isgoyska.

Waxaa wanaagsan in:

- (a) Aad indhaha-indhaha u saarto darawalka.
- (b) Aad xawaaraha dhinto diyaarna u ahaado falcelin.
- (c) Aad xaawaraha iyo qaabka uu sidaa kuu ahaado.
- (d) Aad xawaaraha sidiisa kuu ahaado dhanka midigna u wareego.



Sawirka baaburta waxa laga so xigtay
Maxim Popov©123RF.com

Jawaabaha su'aalaha tusmada ee tijaabada aqoonta

- 1-B, jawaabaha bogaga 42-43, Kordhinta aragtida, leerka bareega
- 2-C, jawaabta bogga 34, Joogsashada
- 3-C, jawaabta bogga 47, Leex-leexashada
- 4-C, jawaabta bogga 49-50, Lug banjarta
- 5-B, jawaabta bogga 38, Isgoysyada

Si Caqli leh Ulabiso - Si Caqli leh U fikir Si, Caqli leh



Adeegyada Badbaadada Wadooyinka, LL

**Bad baadada
Mootadu ADIGA**



TALOOYIN FUDUD: Talooyinka Guud ee Qaabka Badbaado U Wadista Mootada

Ahaaw mid muuqda:

- Xasuusnow in inta badan ay darawaladu dhib ku qabaan aragtida mootoooyinka.
- Iska hubi in leerarkaaga hore ay shaqeynayaan habeen iyo maalina shidan yihii.
- Iisticmaal wareeg dhalaalaya ama warqado dhalaal ee dharkaaga iyo mootadaada.
- Ka fogow in aad ku socoto meel aan leyska arkenin ee gawaarida yar iyo kuwa xamuulka.
- Haddii ay macquul tahay, falaash leerka bareega marka aad xawaaraha dhimeyso iyo inta aadan joogsan ka hor.
- Diyaarso wado aad ku baxsato haddii gawaarida kale aysan ku arkeynin ayna kuso xadgubaan wadadaada.

Bad baado u labiso:

- Xiro koofi tayo leh iyo indho difaac. Koofi wajiga dhan dabooleyso ayaa ah kahortaga ugu wanaagsan.
- Xiro dhar maqaar ah ama wax kale oo adag, dhar difaac (jaakad iyo sarwaal); qoobka korkiisa buud gaaraya; iyo galoojis.
- Dhar dhal-dhalaaya iyo koofi midab dhalaalaya leh ayaa kor u qaadaya fursadaada ah in lagu arko.
- U labiso shil iyo sidoo kale wadida mootada.

Iisticmaal istaraatijiyooyin wax ku ool ah:

- Si joogta ah iskaga fiiri wadada iyo xaaladaha isbadalaya. Iisticmaal istaraatijiyada Indho indheyn-Qiimeyn-Fulin (**SEE**) si aad u qiimeyso ugana jawaabto halista kahor inta aadan ka falcelin khatar deg-dega.
- Sii naftaada firaquo iyo waqtii aad iskaga indho idheyso meelaha aad ku xayirmi karto iyo wadooyinka aad ku baxsan karto.
- Darawalada kale waqtii sii waqtii iyo firaquo ay kuugu jawaaban.
- Iisticmaal bosaska seedka si laguu arko aadna wax u aragto.
- Iska fiiri gawaarida adiga seedkaaga soo gali kara, qaasatan isgoosyada.
- U isticmaal leerka calaamadaha goolad kasta iyo mar walbo ood seed badalaneyso.
- U soco sidii adiga oo aan lagu arki karin.
- Mooto ha wadin marka aad daalan tahay ama marka aad khamri ama daroogo kale soo isticmaashay.
- Baro oo ku dhaqan shuruucda wadada.

Ogow wax ay mootadaadu tahay iyo sida loo isticmaalo:

- Aqri warqada mootada la socoto waxaadna caado ka dhigataa in aad fiiriso kahor intaadan mootada wadin.
- Booqo msf-usa.org si aad u sameyso mid kamida koorsoyinkeena ama aad u qiimeyso warbixinta iyo xogta ku jirta maktabadeena.
- Hel tobabar rasmiya oo farasaara, iyo koorsoyin dib u xasuusina. Wac 800.446.9227 ama booqo msf-usa.org si aad u hesho Koorsada Aasaaska Badbaadada Mootada ee RiderCourseSM ee kuu dhaw.
- Kordhi xirfadaada aqooneed ee wadida mootada kahor inta aadan laamiga korin, qaasatan bareeg qabashada deg-dega iyo qaabka leex leexashada. Muraajacey inta badan si aad xirfadaada u kordhis.
- Leexo inta ay xirfadaadu dhantahay. Goolad galida xooga ah ayaa ah sababta ugu weyn ee shilalka.
- Baro sida loo maareeyo mootadaada xaaladaha xun sida meelaha qoyan bacaadka, dabeesha xooga badan, iyo wadooyinka aan sineyn.


Xasuusnow: In aad ka digtonaato siriqyada isku dhaca iyo wadooyinka aad ku baxsan karto. Dadka baabuurta wada inta badan ma arkaan mootoooyinka. Kusoco ilaa inta ay xirfadaadu dhantahay iyo xadka ay dantu kuu saamaxeyso.

Aasaaska Badbaadada Mootada

LIISKA TOBANKA SHEY EE BADBAADADA DHABTA



Qaado tobabar rasmi oo hel shati.




Wad adigoo daroogo iyo khamri midna isticmaalin.



Kasoo qaad in dadka kale aysan ku arkeynin



Waxa kugu hareereysan ka warqab.



Sameyso boos banaan oo kugu hareereysan.



Ku gal isgoysyada taxadar iyo feejignaan.



Ku dhaqan isticmaalka bareegga deg dega iyo leex leexashada.



Socoshada waalida dib ugu dhigo garoomada tartanka.



U Cusboneysii aqoontada iyo xarifadaadasi joogta



Aasaaska Badbaadada Mootada Rider Choices™ Heshiiska Badbaadada

Waxaan qirsanahay in qoyskeyga iyo asxaabteyda laga yaabo in ay ka walaacsan yihiin badbaadadeyda hadda maadama aan doortay in aan mooto wado. Waxaa sidoo kale fahansanahay in rabitaankeyga uu saameyn karo dadka aniga iga murgo, qaasatan haddii aan ku dhaawacmo shil mooto. Waxaan ogolayah in mooto wadida, sida howlo badan ay ku lug leedahay dhaq-dhaqaaqa gawaarida, ay leedahay ilaa heer halis, waxaana halkaan raali uuga ahay in aan balan qaado in aan si nabab galya ah oo badbaado leh u wado oo aan yareeyo halisteyda marka aan wado. Anigoo ku qorayo xarfaha hore magaceyga ee jumladahan, waxaan ogolaanaya:

- **Inaan ka Digtoonaado Halista Laxiriirta Mooto Wadida** – Waxaan dareensanahay in u wadida mootada si badqableh ay u baahan tahay niyad joogto ah oo lagula tacaalo hawlaha deg dega iyo ka warqabida waxa adiga dhan kugu hareereysan. Waxaan sidoo kale garwaqsanahay in aan mootooyinku aysan difaaca baaburta oo kale aysan laheyn, maadama mootooyinkuna ay yar yihiin oo ay ka dhuuban yihiin baaburta, darawada baaburta ayaa laga yaaba in aysan i arkin waxaana laga yaaba in ay isku key hor jaraan ama igu soo carriiryaan seedkeyga ayagoon iidigin.
- **In aan Tobabarto oo aan Shati qaato** – Waxaan sameynayaa ugu yar hal MSF RiderCourse® si aan u barto istaraatijiyadaha saxda ah iyo xirfadaha lagu maareyo wadida mootada, ayadoo loo raacyo taloooyinka tobabarayasha rasmiga ee RiderCoaches, inta aanan mooto wadada ku wadin. Waxaan soo qaadanayaa shatiga mootada ama aqoonsiga anigoo sido kale ceysmis sax ah u soo qaadi doono mootada, si aan u muujiyi in aan ahay qof masuula.
- **In aan Xirto Qalabka Badbaadada** – Waxaan mar walbo xiran doonaa qalabka badbaadada marka aan mootada wadaayo; haba ugu muhiimsanatee koofida waafaqsin DOT, iyo difaaca indhaha, galooftis, buud qoobka kasareeyo, jaakkad iyo sarwaal, meesha aan doono aanba u socdee ama intee doonto haba qaadatee.
- **IN aan Doorto Mooto Wanaagsan** – Waxaan wadi doonaa oo kaliya mooto jir ahaan igu filan ama ila eg iyo mid aniga igu haboon oo kaliya. Waxaan isbari doonaa kontoroolada laga wado, awoodeeda, bareeg qabashadeeda, dabeecadaha kale ee isticmaalku ku xusan buuga mootada iyo in aan ku murajaceyo wadooyinka aan aadka loo isticmaalin inta aanan wado mashquul badan ama laamiga weyn la fuulin.
- **In aan Istimmaalo Istaraatijiyad Amaana** – Waxaan si joogto ah ooga war qabi doonaa gawaarida igu hareereysan iyo meesha aan joogo anigoo isticmaalaya istaraatijiyada badbaado-kuwadida ee sida SEE - Indho-indhey, Qiimeyn, Kudhaqaqid - iyo kadanbeynta ugu yaraan 2 sakin gaariga iga horeyo. Waxaan la xiriiri doonaa gawaarida kale mar walbo anigoo isticmaalaya leerarka calaamadaha iyo leerka hore marka aan leexanayo marka aan seedka badalanayo, waxaan sidoo kale qalbiga ka sawiranaya wadooyinka aan ku baxsan karo haddii wadada leyga xiro.
- **In aan Kusocdo xadka xirfadaya** – Kuma socon doono xawaare sare ama in kabadan inta aan awoodo, sidoo kalena isma waali doono ama leex leexasho halisa ma sameyn doono. Gooladaha oo xoog lagu galo ayaa ah sababta ugu badan ee baaburta keli-keliga ah ay shilkha ku galaan. Waxaan si daacad ah u isticmaali doonaa awoodeyda jir ahaanid iyo maskaxeed mar walbo oon wadayo maadama labaduba loo baahan yahay in si nabab galyo leh loogu mar wadooyinka.
- **In aan Kusocdo Niyad Kaamila** – Ma isticmaali doono daroogo ama qamri inta aan mooto wado. Waxaan fahansanahay in mooto wadidu ay tahay howl adag oo u baahan niyad kaamila, fahan wanaagsan, go'aan qaadasho hal sikina, jir wada shaqeynaya, iyo isku dheeli tir wanaagsan, sidoo kalena ay daroogada iyo khamrigu ay naaqsiyaan awoodahan. Xaqiqidii, ku dhawaad kala bar inta ku dhimatay shilalka mootada ayaa khamri isticmaalay.
- **In aan Mootadayda u Hagaajin Doono Sida ugu Wanaagsan ay Kushaqeyneso** – Waxan raaci doonaa taloooyinka dayactirka waqtihla ee mootada sida ku xusan buugeeda, waxaan hubin doonaa in si deg dega loo dayac tiro, waxaan ahmiyad gooniya siin doonaa taayarada, maadama aaryada lugaha ay saameyso qabsiga lugaha ee lamiga.
- **In aan Wadi doono Waxbarahsada Nolosha oo dhan** – Waxaan si joogto ah ugu muraajaceyn doonaa koorsoyinka darawala mootada si aan xirfadaheygfa iyo aqoonneyda sare ugu qaado, sababtoo waxyaabaha wanaagsan ee laga barto koorsada maahan kuwo waaraya ebid.

Si aan usoo gaba gabeyyo, waxaan garwaqsanahay haddii aan socdo tobabar la'an, si iska waala, ama anigoon wadanin dharka difaaca ee mootada, waxaan ku sugaranahay halis sare oo ii keeni karta dhaawac nafteyda wax kabadala ama dhimasho. Tani aniga kaligey ima saameyneso waxa ay sidoo kale saameynesa qoyskeyga iyo asxaabteyda. Sidaas darteed, waxaa iga go'an in aan ilaaliiyo badbaada aana noqdo darawal masuula ah.

saxiixa: _____

magaco oo farweyn ku qoran: _____

taariikhda: _____

marqaatiga: _____



MI-REP
BARNAAMIJKA WAXBARASHADA WADAH
EE MICHIGAN

Michigan.gov/Motorcycling